
AlmaZ Books
Almaz Books

XEELADAHA GUUSHA

Weydii Xeeladaada Guusha hakuu jawaabee

https://t.me/Almazbooks1



W/Q:- C/raxmaan Cali Maxamed
(Rafiiqi)

AlmaZ Books
Telegram

Buugga :

*X*eeladaha guusha

Waxaa qoray :

C.raxman Cali sh.maxamed (rafiiqi)

AlmaZ Books
Telegram
Almaz Books

TUSMADA BUUGGA

Mahadnaq 5
Afeef 6
Ogaysiis 8
Hibeyn 9
Hordhac 10
CUTUBKA 1-AAD 11
Xaddidaadda hadafka (jaangoynta) 11
NOLOSHAADA HADAF MA KA LEEDAHAY? 13
Cutubka 2-aad 16
Xeeladda Guusha 16
Cutubka 3-aad 35
WAQTIGA 35
Waqtigu waa nolosha 36
WAQTI DILAHA UGU WEYN 38
Waqti dilaha labaad 39
Waa maxay sababta aan waqtiga u ilaalinayno ? 42
Sida loo maareeyo waqtiga : 43
Maxaa kugu caawinaya ka faaidaysiga waqtiga? 44

Almaz Books

MAAMULIDDA WAQTIGA 44

CAADOOYINKA AY DADKA GUUL DARRAYSTAA CAAN KU YIHIIN 46

Cutubka 4-aad 53

RAAXADA NOLOSHA 53

Sheeko 57

Talooyin ku caawinaya 61

Cutubka 5-aad 73

WELIGAA HA DEG DEGIN 73

" Dag dagsiimo door ma dhasho " 73

Xawaare Xadeysan ku soco! 75

WAAD GUULAYSAN KARTAA EE HA QUUSAN. 76

WAQTIGIITAGEY XIKMAD BAA KU SUGAN, KA SOO SOCDANA YIDDIDDIILO 78

Cutubka 6-aad 88

7-da Xeer ee Dahabiga ah ee Noloshaada Kuu "Sahlaya" 88

HORUMARINTA NAFTA IYO HIIGSIGA MUSTAQBALKA 92

Guusha 94

Sidee Loo Yeeshaa Shakhsiyad Wanaagsan? 96

XEERKA 15 DAQIIQO 99

Almaz Books

7 Tallaabood oo Aad Ku Daahrogi Karto Hibadaada Qarsoon 100

9- QODOB OO MUHIIM U AH QOFKASTA 107

AKHRISKA IYO GUUSHA.....110

XASIL OO ILA GARO: XIKMADO KOOBAN.....111

9 Xeeladood Oo Lagu Xoojiyo Awoodda Maskaxda (kor u qaad miiganaantaada).....116

Almaz Books

Mahadnaq

Marka hore Waxaa Mahad iyo Amaam leh Awood badanaha aana laga awood badnayn Dulqaad badanaha Naxariista badan Ciqaab ahdkaha Ciddii uu ciqaabo. Ilaahbaa mahadleh oo ii suurta galiyay inaan dhameystiro .buugga XEELADAHA GUUSHA. Nabadgalyo iyo naxariiskorkiisa ha ahaaato Nabiyullaahi Muxamed.

Marka xigta waxaan u mahadcelinayaa dhammaan inta igala qayb qaadatay soo bixitaanka buuggaan. Si gaar ah waxaan ugu mahadcelinayaa qofkasta oo in uun igu booriyay.

Sidoo kale waxaa mahad aana la ilaawi karin u sugnaatey tababaraheygii igu taba baray habqoraalka Ustaad C/naasir Yaxye cali. Ilaahey ha barakeeyo abaal marintiisana Janatul firdowsa alle haka dhigo.

Sidoo kale waxaan u mahadcelinayaa dhammaan dadkii ila uruuriyay waxyaabaha faaiidada leh ee buuggaan ku jira.

Waxaan u mahadcelinayaa Madbacadda Jaabir oo Naqshadeysay buugga jildigiisa. Daabacaadda hagarla'aaneedna lahayd.

Si qaas ah waxaan u mahadcelinayaa Walaalaheyga Dhiiri galinta iyo caawintaba ila garabtaagnaa ee kala ah:

Ismaaciil Yuusuf deeroow (Barre)

Muxudiin C.raxman sh.maxamed (M.k)

Almaz Books

Afeef

waxaa iga afeef ah, in qofkii buuggaan aqriya ee qalad ku arka aanu yaabin ama wuxuu doona aanu iska sheegin waayo waxa suurto gal ah in aad aragto wax badan oo qalad ah. Sababtoo ah Waxla qoray oo aana qalad lahayn waxaa ka jira Kitaabka Qur'aanka kariimka ah. waxaana ku leeyahay haddii aad wax qalad ah ku aragtid adoo mahadsan ila socodsii si aan u saxo, anaa u diyaarsan inaan saxo. Sidaas oo kale waxaa hubaal ah in haba yaraatee qalad uu ku jiraayo qoraalkeyga, waayo qoraal qalad lagama dhameyn karo,

Arday dhigta maadada farshaxanka (Arts) ayaa maalin waxa uu sida ugu fiican farshaxannimadiisa u sawiray Madax banii aadam. Intaas ka dib ayaa wuxuu dhigay Meel Suuq ah oo ay dadku u badanyihiin. Isagoo soo bandhigaya xirfaddiisa farshaxannimo. wuxuuna raaciyay hadal yar oo ah (" KANI WAA SAWIR AAN SIFIICAN USOO QURXIYAY, WAANA HUBAA INUU QURXOON YAHAY, FADLAN QOFKII SAWIRKAAN ARKEY EE QALAD KU ARKAY INTA KA QALDAN SAWIRKAAN HA II CALAAMADEEYO")

Galabtii markii la gaaray ayuu sawirkiisii soo eegay, mise meel kasta waa la calaamadiyay oo qalad ayaa laga sheegay. Isagoo ka niyad jabay go'aana ku gaaray in uu farshaxan oo dhanba iska daayo ayuu macalinkiisii arrinkii u sheegay. Macalinkii ayaa ugu jawaabey (ARDAYGAYGIYOOW DADKA OO DHAN WAXAY JECEL YIHIIN IN AY WAX DHALIILAAN LAAKIIN MA JECLA IN AY WAX TOOSIYAAN. SI AAD U OGAATID XAQIIQADA HADALKANA BARRI

Almaz Books

ISLA SAWIRKII MEESHI DHIG ADIGA OO HADALKII HORE RAACINAYA " MEESHA IGA QALDANA SIDA KU SAXAN IISOO QOR") ardeygii sidii ayuu yeelay Halqof oo sawirkii meel ka calaamadiyay lama arag.

"""Dadku in wax la dhaliilo way jecelyihiin laakiin in la saxo ma wada jecla"""

Sidaas darteed aqristoow waxaan kaa codsanayaa in wixii qalad ah ee aad aragto aad ila socodsiisid adiga oo iisoo Marinaya Cinwaanka ah.

Caamyare@gmail.com ama 0615682619 / 0616737648

Almaz Books

Ogaysiis

buuggaan lama daabacan, karo lama sawiran karo ama waddo kale oo ka baxsan wadada loogu talagalay looma isticmaali karo iyadoo aan fasax laga haysan qoraagga buuga

C/raxmaan cali Sh. maxamed (Rafiiqi)

Almaz Books

Hibeyn

Buuggaan waxaan u hibeeyay

Aabbaheey iyo hooyadeey, Isoo koriyay oo isoo barbaariyay

ilaahey ha barakeeyo Albaabadiisa naxariistana ha ufuree.

Almaz Books

Hordhac

Buugga Xeeladaha guusha waa buug loogu talagalay qofkasta oo doonaya inuu ka tago meesha uu markaa joogo, isagoo aadaya meesha ka saraysa. Qofkastana wuxuu u tilmaamayaa jaranjaradii uu ku tilaabsan lahaa. Wuxuu sheegayaa talaabihii la qaadi lahaa iyo qaabkii loo qaadi lahaa. buugu waxaa ka kooban yahay lix cutub oo mid kasta goonidiisa u hadlayo.

Wuxuu wax ka sheegayaa wax yaabaha hormarka qofka kaalmeeya iyo faaiidada shaqsiga halka ay ku jirto.

Wuxuu wax ka taabanayaa waqtiga iyo ilaalintiisa. Faaiidada ay leedahay qofka oo waqtigiisa ilaashada. Habka waqtiga loo ilaaliyo. Waqtiga iyo waxa dila iyo sida loo xalinkaro.

Wuxuu qofka aqriyaa u tilmaamayaa Qodobada shaqsiyadda dhisa iyo hababka fudud ee uu qofku ku hormari karo.

Wuxuu wax ka barayaa qofka Xeerarka laga dajiyay nolosha iyo hormarinta nafeed.

Wuxuu wax ka barayaa qofka sida uu uga hortagi lahaa caajiska iyo dib u dhigista badan.

Wuxuu ka ka barayaa qofka sidii uu u hormarinlahaa Maskaxdiisa iyo qaabkii uu u kordhinlahaa shaqadeeda.

Hadaba buugaan hadaad aqriskiisa billaabaysid waxaan kuugu naseexaynayaa inaad qoo qaadatid warqad aad ku qoratid wixii ku cajabiya.

Almaz Books

CUTUBKA 1-AAD

Xaddidaadda hadafka (jaangoynta)

Almaz Books

Hadii aan samayn lahayn wax kasta oo aan samayntiisa awoodno waxaan samayn lahayn mucjiso.

Waxaa yiri Tom Addison

Kaalay oo iiga jawaab su'aashaan

Tartan kasta maxaa loogu sameeyaa meel calaamad ah oo qofkii gaara uu guulaystay ?

waxaa la doonayaa in uu qof kasta oo tartanka ku jiraba uu naftiisa ku yiraahdo mar un meeshaas gaar ! yaanay

qofna kaaga hormarin !

Ilaahey (SW) Waxaa uu inoo sheegay in uu Jano iyo naar abuuray Qofkii dadaala oo aana adduunkaan iyo dhalaalkiisa ku kahsoomin ee hadaf ka dhigta in uu janada galo oo camal wanaagsan sameysto uu jano ku abaal marin doono.

Halkaas waxa laga fahmayaa in Allah S.W uu Bini aadamka u sameeyay hadaf ay higsadaan taasoo ah naxariistiisa wayn oo uu dadka ku abaal mariyo.

Adiga maxaa kuu diiday inaad hadaf Kaas higsato ?

maxaase kuu diiday inaad sameysato hadafyo yar yar oo noloshaada adduun quseeya maadaama insaanku aanu hormar lahayn hadaf la'aan.

Almaz Books

maxaa kuu diidey inaad inta aad nooshahay xaqiijiso hadaf maanta aana dunida laga xaqiijin oo markaad xaqiijiso dad badan higsan doonaan.?

Bal adiga fikiroo wax muuqda noloshaada ka badal inta lagu gudo jiro sanadadaada Nabadda. Ogow adiga noloshaan ma lihid go'aanna kama gaari kartid jiritaankeeda mana ogid mar aad dunidaan ka tagaysid.

Daqiiqaddii ku dhaafta adiga ma xukuntid Tan dhimanna adiga ma xukuntid, kaliya waxa ku anfacaya daqiiqaddaan aad ku jirtid wixii aad uga faaiideysatay. Adduun iyo Aakhiraba.

Marna ku dhihi maayo wax dib u dhigo maxaa yeelay Maba lihid waqtiga soo socda ! Waayo ma adigaa og inaad gaaraysid ?

Yaa kuu ballan qaadey inaad daqiiqaddaan soo socota gaarayso ?

Hormari naftaada.

Hadafyo dhigo.

Howlaha kala hormari.

Hal marna hawl ha dib dhigin.

NOLOSHAADA HADAF MA KA LEEDAHAY?

In badan oo dadka kamida nasiib daro waxay noloshoodu ku luntaa yididiilo, laakiin ma laha qorshe ku dhisan daraaso si ay yididiiladaas u rumeeyaan, taas oo kale waxaa inoo cadaynaya tusaalaha hoos ku qoran.Waxaa jiray laba nin oo shaqaale ka aha mid kamida sharikaadka dhismaha, shirkadii ayaa waxay u dirtay si ay usoo hagaajiyaan mid

Almaz Books

kamida dusha sare ee guri kamida guryaha, markii labadii shaqaale ay soo gaareen wiishkii ay dusha sare ku fuuli lahaayeen ayaa waxay indhaha ku dhufteen boor ay ku qoran tahay (wiishku wuu cadilan yahay). Way joogsadeen xoogaa iyaga oo ka fikiraya wixii ay samayn lahaayeen, laakiin si dhakhso ah waxay u go'aansadeen inay jaranjarada fuulaan, inkasta oo gurigu ka koobnaa afartan dabaq, way fuuleen iyaga oo alaabtoodiina dhabarka ku wata, dadaal fara badan kadib ugu danbayn waxay gaareen dusha sare, markaasuu mid walba ka kale fiiriyay, mid kamida ayaa kii kale ku yiri waxaan kuu hayaa laba war oo kala duwan midi waa mid farxad leh midna waa mid xun.

Saaxiibkii ayaa yiri: Warka fiican ii sheeg marka hore Saaxiibkii ayaa yiri: bishaarayso ugu danbayn waxaan soo gaarnay guriga dushiisii sare kaasi waa warka fiican, Saaxiibkii kale ayaa yiri: ii sheeg warka kale ee xun. Saaxiibkii ayaa ugu jawaabay: fooqani maaha kii la rabay inaan hagaajino.Hadaba Qisadan maxaa looga jeedaa maxaanse ka qaadanaynaa? Nasiib daro dadka qaar baa noloshoodu ay lamid tahay sida labadan shaqaale oo kale wuu dadaalayaa, wuu dhididayaa ugu danbayntiina wax natiijo gaarimaayo. Maxaa yeelay? Maxay sidaasi ku dhacday? Jawaabtu waxay tahay si fiican uma qorsahaysan inta aanu shaqada ku dhaqaaqin Naftiisana uma samayn barnaamij uu kaga jawaabayo su'aalaha hoos ku qoran Maxaan doonayaa marka hore? Sidee baan se waxa aan doonayo u samayn karaa?

Qisadani waxay dib inoogu celinaysaa su'aashii aan hadalkeena ku bilawnay Noloshaadu ma leedahay hadaf ay doonayso inay ka gungaarto oo ay xaqiijiso Ma garanaysaa meesha aad u socoto? Jaamacada Harvard ee maraykanka ayaa waxay daraasad ku samaysay

Almaz Books

aradayda dhigata kuliyada maamulka iyo maaraynta (business Administration) kuwaasoo qalin jabiyay toban sano ka hor. Waxay ogaadeen in 83% oo kamida ardaydii daraasada lagu sameeyay aanay noloshoodu lahayn hadaf cad oo xaddidan. Waxaana muuqata inay aad u dadaalayaan si ay u noolaadaan oo ay naftooda iyo ehelkoodaba ugu diyaariyaan daruuriyaadka nolosha. Dhinaca kale waxay ogaadeen in 14% kamida ay ahaayeen qaar leh hadaf cad, laakiin hadafyadaasi aanay ahayn qaar qoran oo leh qorshihii lagu xaqiijin lahaa markii la eegay dhinaca wax qabsiga, waxaa la ogaaday in sadex jeer ay ka nolol sareeyaan kuwii hore. Ugu danbayn nooca sadexaad oo ah 3% oo ardayda kamida waxay ahaayeen qaar leh hadaf xaddidan oo cad kaasoo waliba ay qoreen oo hadana ay u dejisteen qorshe cad oo u suuragaliya xaqiijinta hadafkooda. Markii la eegay wax qabsigoodana waxay toban jeer ka sareeyeen kuwii hore. Sida kor ku cad waxaad arkaysaa ahmiyada ay leedahay xaddida hadafka iyo dejinta qorshaha noloshu Waxaa kale oo inoo muuqata ahmiyada ay leedahay inaan yeelano go'aan iyo doonis aan ku xaqiijino hadafka aan u socono gaaristiisa.

Almaz Books

Cutubka 2-aad

Xeeladda Guusha

Almaz Books

Xeeladahaan aan soo bandhigi doono waa xeeladaha dhabta ah ee guusha lagu gaaro, kuwaasoo la tijaabiyay dad badan oo guulaystay ayaana laga soo xigtay iyagoo la xaqiijiyay inay tahay wadada dhabta ah ee ay mareen.

Guushu iskama timaado waxayna u baahantahay inaad marto wadada guusha iyo xeeladaha lagu helo guusha. Tusaale Hadaad doonayso inaad ku guulaysato tartanka dheer ee orodka, waa in aad marka hore inbadan U tababarataa sidii aad ugu ordi lahayd wadada dheer ee dhibka badane tartamayaashu ku ordayaan.

Haddii aad doonayso inaad ku guulaysato hanashada qof qalbigiis waa in aad u tababarataa sidii aad marka hore qofkaa qalbigiisa ugu abuuri lahayd Naxariis.

Haddii aad doonayso inaad ku guulaysato abaal marinta qofka ugu nabadda jecel adduunka waa in aad marka hore nabadda adigu billowdaa. Hadaba muhiimadda hadalka aan uga socdaa waa aad barato sababta guusha lagu kasbado. Hadaad u baahan tahay inaad qado katsato ugu horayn waa inaad marto wadada qadada karinteeda loo maro oo ah inaad marka hore adeeg suuqa ka keensato kadibna intaa dab u shidid aad karisid. Guushana waa caynkaa waxay kaa doonaysaa inaad u diyaargarowdo oo aad wadadeeda soomarto marka hore.

Almaz Books

Xeeladda 1-aad

Rabitaan xooggan.

Rabitaanka xooggan ee aad wax si dhab ah u rabto waa waxa kaliya ee kuu suurta galiya inaad wax samayso. Bal u fiirso tusaalooyinkaan yar yar; Kasoo qaad adiga oo ay baahi daran ku qabatay, maxaad samaynaysaa adigu ? Jawaabtu way caddahay waxaad raadinaysaa meesha kuugu dhaw ee aad cunno ka heli karayso. Hadaba ka waran haddii aad markaa iska dhaadhicisid inaadan helayn wax cunno ah.

Xeeladda 2-aad

Dhinaca san oo wax kasta laga fiiri waligaa.

Dhinaca san oo wax laga fiiriyo haddii aan ka eegno xagga Diinta oo ah marjaca aan u laabano hadaan islaamnahay, Allah SW wuxuu Xadiisul qudsi ku leeyahay : **Adoonkaygu waxa uu iga malaysto ayaan ahay.** Hadaba ka waran hadaad markasta filatid inay dhibaato uun kugu dhacayso oo aad isleedahay waad guuldaraysanaysaa ? waxaad alle ka filatid ayaad leedahay Camalna wuu jiraa dadaalkaase sharaf ah.

Wax kasta oo aad aragtid dhinaca wanaagsan ka raac ha aadin xumaanta.

Sheeko.

Waxaa la wariyay in uu hadda ka hor jiray macalin caqli badnaa kaasoo ardaydiisa tusaale la fahmi karo siin jiray si ay wax ugu fahmaan. Maalin maalmaha ka mid ah ayuu macalin ardaydii u dhiibay warqado banaan

Almaz Books

oo aanay waxba ku qornayn marka laga reebo dhibic yar oo warqadda dhexdeeda ku taalay.

Kadib wuxuu ardaydii ku amray inay warqaddaa ka faaloodaan oo waxa ku qoran ay qiixitaano iyo micnayaal badan u seeyaan.

Ardaydii dhamaantood waxay ka faaloodeen dhibicdii modoobeed ee warqadda dhexdeeda ku taalay. Iyagoo dhahaya waxaa warqadda ku dhex taala dhibic madow oo sida kubadda u samaysan iyo sifooyin kale oo la mid ah.

Macalinkii wuxuu yiri dhamaantiin waad fashilanteen waxaadna qariseen medabka ugu badan warqadda kaasoo ahaa caddaan.

Hadaba ha noqon adiga qof sidaas oo kale ah oo qofka dhiniciisa xun ee noqo qof dhanka san wax ka eega.

Ha noqon tixsi dadka xumahooda raadiya ee noqo shini dadka malab macaan u samaysa.

Sheeko kale

Waxaa jiray wiil ku faani jiray in aanu tuuggu waxba ka xadi karin asxaabtiisii oo dhan ayuu ka dhaadhiciyay arrinkaas. Baaritaano badan oo lagu sameeyayna waxba waa looga qaadi waayay. Asxaabtiisii oo arrintii rumaystay ayaa markasta oo ay aadayaan meel ay tuugo joogtaba waxay u dhiiban jireen waxay isleeyihiin armaa la idinka xadaa. Maalin maalmaha ka mid ah isagoo alaab badan oo loo dhiibay wada ayuu is yiri maanta waxbaa lagaa xadi doonaa. Saacado kadibna wuxuu

Almaz Books

dareemay in wax laga dafay oo ay tuugadu ka faaiideysatay filashadiisii xumayd.

Hadaba wax kasta oo kusoo mara dhinaca wanaagsan ka fiiri si ay wanaag u noqdaan. Ogsoonow hadaad dhib ka fulatid dhib ayay noqonaysaaa.

Xeeladda 3-aad

. KALSOONI

Kalsooni: waaa in aad u aragto naftaada mid wax soo saari karto ama wax soo kordhin karta guulna gaari karta. naftaada markaad ku kalsoonaato ayaa

hiigsan kartaa waxaad rabto. waana furaha ugu muhiimsan ee guusha lagu gaadho.

'Hal fure oo muhiim u ah guusha waa kalsoonida, hal fure oo muhiim u ah kalsooniduna waa diyaargarowga.'

_ Arthur Ashe

Kalsoonidu waxaay ku siinaysaa awood aad hawl ku qabato taasina waxeey ku hor seedi kartaa in aad si dhib yar aad u guulaysato. Kalsoonidaas oo kuu horseeda horumar wayn taas oo kaa dhigaysa ruux ku haboon xaqiijinta hadafkiisa, naftaada oo aad ku kalsoonaataa waxaay ay kaa dhigaysaa mid wax walba qaban kara.

'Hadii aad naftaada kalsooni siisid waxaad jiidi kartaa ku dhawaad wax walba.'

_Katy Perry

Naftaada ku kalsoonow waxaa aad ta qaannaa wax ka badan waxaa aad u malaynaysid in aad taqaaanid dadkana ku kalsoonow, in aad dadka ku kalsoonaato waa shay loo baahan yahay maxaayeelay hadaadan dadka ku kalsoonaani naaftaadana kuma kalsoonaan doontid iskana ilaali gabi ahaan ba erayga kalsoonidarro.

Sheeko kalsooni ka muuqato.

Shinni ayaa lagu yiri waxaa lagaa doonayaa malab ay cabaan madaxda berri noosoo socota oo kayntaan aan joogno imaan doonta .

shinidii ayaa si daganaan ah ku tiri hadda wax malab ah ma diyaarsano balse geedaha kayn heblaayo oo waddanka hebel ah ku taala ayaan ka doonaynaa. gudigii malabka u xilsaarnaa oo dhan ayaa halmar naxdin afka taagay " Ma wadankaas ayaa laga yaabaa xitaa in aad todobaadka dambe ka keentaan madaxda miyaad nagu ceebeynaysiin !? " Shinnidii ismaba waaline waxay ku jawaabeen " adinka sii diyaarsada meeshaad ku shuban lahaydeen anaga waan hubnaa inaan keeni karno xitaa inta aadan diyaarsanina meeshaan idin kugu shubilahayn malabkee "

habeenkii shinida lagu wargaliyay subax deedii malabku diyaarbuu ahaa

shinidi waxay soo hor istaageen gudugii malabka laga rabey in ay guddoomaan waxaya ku dhaheen " keensada meel aan malabkan idin kugu shubno " Gudugii oo hadalka shinida ee ahaa " waan keeni karnaa barri " oo aan wax diyaar garow muujin ayaa yiri waxyar na suga waan diyaarinaynaaye halkaasna waxaa ku rumowday hadalkii shinida.

Almaz Books

sheekadaan waxay na tusaysaa in kalsoonida ay leedahay awood dheeraad ah asalka kalsooniduna uu yahay diyaar garowga guushuna uu ka dambeyso kalsoonida.

Ahaw naftaada

Inaad naftaada ku kalsoonato oo aadan cidna la barbar dhigin waa jidka guusha.

Ha ka dayrin waligaa Noloshaad la daris tahay

Ha u doodin abidkaa Mid kaloo ku dayasho ah.

Xeeladda 4-aad

DHAQAN WANAAG

Hadaad rabto inaad guulaysato waa in aad dadka si fiican ula dhaqanto kana fogaatid in aad dadka kula dhaqanto dhaqamo xun xun. Dhaqanka wanaagsan waxaa uu kaa dhigayaa mid bulshada uu ku dhax nool yahay ixtiraaman.nooloshiisana ku guulaysta.

'Anshaxu waa buundada u dhexeeya yoolka iyo guusha.'

_ Jim rohn

Adiga ayaad aamini lahayd oo hantidaada iyo sirahaaga ku

labadaan qofka koowaad :

wiil sagaarka iska afuufaaya

Almaz Books

madaxa food buurta Suurad la moodo u jaran tahay shaarigu kulleetigiisu konton nijaasnimo ay ka muuqato.

Surwaalka uu wato toban iyo shan meelood ay ka duleesho

Salaad uu dukado iyo Alle ka cabsi warkiisba daaye Qofkii ku faraq xirta xitaa aanu salaad dukanayn.

Naagaha laba labo iyo saddex saddex u wada iyadoo cid u xalaalaysay aaney jirin.

Waqtigiisa aana ilaalin oo xiligii uu doono ayuu seexdaa.

Waalid iyo wax dhalay oo xaq kule shaqo kuma leh oo maba yaqaan wax xaq layiraahdo.

Surweelku dhulkuu xaaqayaa oo sharci iyo wax diin asaaga shaqo kuma laha.

Ama gabar dharku ku dhagan yahay ee la moodo inay qaawnaashada ku faaneyso. Oo cadarka ay is cadriday la moodayo inay dunida ugu faaneyso, Ileen haddii aanay is cadrin umaddaa ka carareysoo way is ibtileysaye.

maqaarka ay iska fiiqdey loo maleeyo Carsaanyo badeed

dharka sidii sharciga u jideeyay uma qaadatee wey daba goojaartaa,

yacnii Xijaab saxa ma wadatee waa qafiif ama waa haaf oo intii laga rabey inuu asturo ma gaarayo oo waxaa ka muuqda xubnaha jirkeeda.

Almaz Books

Muuqaaladeeda oo dhaqan xun baraha bulshada lagama waayo oo iayadoo qaawan ayaa meelo badan laga helaa

Diin islaam iyo tarbiyo wanaagsan shaqo kumalaha oo xitaa hooyadeed waala dagaashaa.

Nimanku uma kala saaree kii lacag sheega ama u yara qosla oo in yar bixiya ayaa qaba.

Cidna waano kama yeesho oo dadkaba way yastaa.

Dulqaad malaha oo daawadaa waxay ahaydba ka tirtirtay.

dadka nuucaan ah hantidaada ama siraha Compan -gaaga maku aamini lahayd.....?

Isku soo duuboo Tarbiyada Islaamka wax shaqo ah kumalaha.

Maxaad Ugu diiday ?? halkaan ku qor waxaad ku diidey oo xasuusnow.

.....

.....

.....

Almaz Books

= Qofka labaad.

Wiil aan balwad lahayn madaxa aana jarab sida gaalada dharkiisa uma labisto sida gaalada ee waa sidii ay diintu inoo jideysay oo ah in aanu Surwaalka anqawga faysha ka hoos marin.

Inta badan masaajidka ayaa laga helaa. had iyo jeer dadka ayuu waaniyaa oo ma jecla in uu qalad si kas ah u galo.

Markasta oo aad aragto waxaad arkaysaa isagoo dadka wanaagga fara xumaantana ká reebaya.

Wixii uu kuu sheego adaa yaabeysid xaqiiq nimadooda.

Haddii uu qalad galo ileen waa Bani'aadane isla markiiba raalli galinta ayaa ka horaysa.

Candhuuftiisa meesha ay gaarto gacantiisa ayaa la socota.

lagama yaabo in uu qof Si kibir ah u daandaansado.

Danahiisa gaarka ah Wuxu ka horaysiiyaa waalidiintiisa amaradooda.

wuxuu iska ilaaliyaa in salaadda isaga oo masjidka ka maqan la xirto.

Ma arkaysid Isagoo dad xamanaya.

isku soo duuboo waa qof tarbiyada Islaamka u qaatey si dhameystiran.

Ama gabar Akhlaaq wanaagsan leh. Aana isticmaalin waxyaabaha sanadadaan dumarka qaarkood fashilay

Daawooyinka wax dulleeya.

Almaz Books

Ama Aaladaha wax dulleeya.

Xijaabkeedu uu yahay kiisaxda ahaa ee Allah (S W) U jideeyay inay dumarku xirtaan.

Meelkasta lagama helo oo waxay ka dambeysaa Waalidiinteed.

Marna ma caasinayso Amarada ay siiyaan waalidkeed.

Inay iyadu sanaddo dhibanaato ayay ka doorbiddaa inay hooyadeed hal maalin dhib dareento.

Waxaa laga helaa Kaliya boosaska khayrka lagama helo meelaha sharta.

Ma jecla inay Qof la dagaasho.

hadalkeeda meel kasta lagama maqlo.

Si kasta oo ay u saxan tahay haddii waalidkeed waxaas ka diidaan waa ka hartaa.

Lama arko iyadoo qof xamanaysa.

Marka kaliya oo codkeeda Si macaan loo maqlo waa Marka ay aqrinayso Kalaamka Alle.

Iskusoo duuboo waa gabar sidii la rabey ugu dhaqantay Tarbiyada wanaagsan ee Islaamku Inagu tarbiyeeyay.

Hadaba Labadaa qof ee aan soo sheegnay Oo kala ahaa :

1:- Mid dhaqan Xun.

2:- Mid dhaqan wanaagsan

Keebaad keebaad adiga ahaan Shaqaalaysiin leheed ?

Halkaan ku qor oo xasuusnoow iskana fiiri dabeecadahaas adiga keebaa tahay. waan ogahay dabeecadahaas ma wada lihid balse Qaarbaa leedahay.....

Xeeladda 5-aad

. ISKAASHI

Alle (S W) markuu abuuray koonkaan wuxuu ka dhigay mid laba labo iskugu tiirsan. Taasi waxaan ka dareemi karnaa in iskaashigu uu dunida laf dhabar u yahay. Inta badan waxyaalaha ama noolaha aad arki doonto waa laba labo. Cir Dhul, Lab dhadig, iyo in kale oo aana halkaan kusoo koobi karin.

'Wada shaqayntu waxa ay yaraysaa hawsha waxa ayna badisaa guusha!' _Qoraha lama yaqaan" Gacmo wada jir ayay waxku gooyaan."

"Haddii loo Kala haro lama hormaro."

" Inta nin dhibta Tol ma dhibto "

Kali waa karaahi

Far kaliya fool ma dhaqdo.

Bulsho wax aay horumar ku gaartaa iyadoo dad keedu is kaashado oo isku kalsoonaadan. iskaashigaasina wuxuu u hor seedaa midnimo iyo wada jir meesha midnimo taalo guuli waataala maxaayeelay iskaashato ma kufto. Taasna waxaa inoo iftiiminaya gabaygan:

Taageeraday labo gacmood tamar ku yeeshaane

Almaz Books

Tiska waxaa la qaadaa markay tiirisaa bidixe

Hadday midigtu keli taagan tahay tahar ma goyseene

Mar kale waa iyadii iskaashiga laga lahaa: Xaajadu ma gobol oo ma gobol, haysku ganac goyne Gobolkeed gugii hore wixii go`ay ha loo daayo Gawdhagawdh yar baa nagu haree aan idiin gaadhsiino Dabadeedna geeshadda sidii gacal haloo aa`o Nin gooni uma ciidamee gacal ha lays moodo Markaad rabto inaad hawl guul ka gaadho waxaa fiican in aad dadka la kaashato oo aadan kaligaa isku gaar yeelin maxaa yeelay far kaliya fool ma dhaqdo hadaad dadka la kaashato hawshaada waxaad ka faa`iidi. in aad hawsha si dhib yar u qabatid iyo in wakhtiga oo ah halbeega nolosha qofku uu kuu noqdo mid aadan ka qooma mayn.'Ma qabsan karno wax yaalaha aynnu rabno anaga oo wadajirna mooye.'

Xeelada 6-aad

. DAACADNIMO

" Daacadi ma hungowdo " " Sir ma qabe saabaa biyo u celiya "

" Weel khayaano ma buuxsamo."

" Hal booli ah nirig xalaal ah ma dhasho"

" God sireed ha qodin hadaad qodidna ha dheeray ku dhici doontidaana lama ogee "

" Calool Bugta iyo waji furan la isku waayay "

Almaz Books

" Dab munaafaq shiday baa duuldhan guba "

" Wax aan daacad ahayn gadaal ayay ka xumaadaan "

" Kuu dhaamin maayo dhagarbey ka roontahay "

" Labadii sir ku heshiisa Saaqay ku dagaalaan "

" Lillaahi iyo laqdabo meel ma wada galaan "

" Mar I dage Alle ha dago mar labaad idagese anaa isku dagay "

" Nimaad kabahiisa tolayso, oo karfartaada tolaaya ayaa jira "

" Nin ciid kugu xaaray waxba kuuma dhibine calooshiisa ayuu ku tusay "

" Daacadnimo iyo daab yaambo ayaa lagu dagaa. "

" Sirrow ma hodmo "

Daacadnimadu waa tilmaan ka mid ah tilmaamaha ay leeyihiin dadka guulaysto waxay daacad u yihiin naftooda, dadkooda iyo dalkooda ma khiyaamaan dadkooda maxaayeelay waxay ogsoonyihiin in khayaanadu ay ku soo dul noqoto khaa`inka laftiisa. Khaa'inkuna uusan liibaanin.

Kuwa dadka khiyaama iyaga ayaa ugu walwalbadan, sababtoo ah wuxuu filanayaa in mar uun lagu fahmi doono khayaanada uu dadka khayaamey.

Haddii aad ay in yar oo khayaamo ah kugu jirto fadlan iska saar oo daacad nimada raadso Haka baqin inaad fashilanto haddii aad weyso wax ku caawiya ee u sabir dhibka iyo kali nimada go'aankaaga.

Ma jiro qof hoos kuu dhigi kara, si taas la mid ahna qofna kor kuuma qaadi karo, intaba adiga ayaa sameyn kara.

Almaz Books

Marka ay wax kasta dhanka xun kusoo xijiyaan adiga dadaal iyo dulqaad ku wajah.

Qofna ha khiyaamin sababtoo ah qofka aad khayaantey waad ilaaweysaa balse isaga kuma ilaawayo.

Inta aad Khayaano wax ku raadsanaysid waad awoodaa inaad daacadnimo waxku raadsato.

Risqiga Allah (S.W) ayaa bixiya Xalaasha ayaana Barako badan.

Ku dadaal Inaad Xalaaaha badsatid xaaraantana ka fogaatid sidaas ayaa guul ahe.

Xeeladda 7-aad

AQOON

" Dadku waa mid ay laani waddo iyo mid ay Laabi waddo "

"Carruurtu lugbey ka saan qaadaan, Ragna aqoon "

" Fal aan laabta jirin iyo faruhu way isdiidaan. "

" Xisaab ninka aan dhabanka uga dhididin Xamaalibuu dhabarka uga dhididaa "

" Maskax fariid ah lahow, ama fadhi aana daalin lahow "

" Ilmaha yar iyo warqadda cadba waxay qabsadaan ma siidaayaan "

" Baruhu waa shumac Naftiisa gubaaya, Dadka kalena u iftiimaya "

" Aqoon la'aan waa iftiin la'aan. "

Aqoontu waa furaha guusha waana midka mid ah astaamaha lagu gaaro guusha aqoontu waa iftiinka nolosha waana miisaanka uu qofku ku kala soocayo guush iyo guuldarada, samaanta iyo xumaanta

wax barashadu waa in Jahliga laga baxo aqoonna la yeesho. Mugdigana ileys lagu badalo.

Aqoontu waa anshax waa edabta waa anfac waana shayga ugu qaalisan oo uu qofi hanti ahaan u leeyahay waana shayga kuu sahlayo in aad gaadhid himiladaadatusaale hadaad tiraahdo waxaan doonayaa inaan noqdo wariye oo aadan baranin cilmiga saxaafada waad ku guul daraysanaysaa inaad noqoto wariye fiican si aad guul uga gaadho mihnadaada waa in aad marka hore barataa cilmiga saxaafada. raadinta aqoontuna waa sir ka mid ah siraha guusha lagu gaaro.

Aqoonta yar waxaa lagu kabaa aamus.

Qofka lama ogaankaro inta uu cilmigiisu la'eg yahay haddii aanu isagu hadlin.

Calaamadaha ugu waaweyn ee dadka guuleystay leeyihiin waxaa ka mid ah In wixii ay bartaan aanay ilaawin ayna raadiyaan wax cusub oo ay bartaan.

Marna ha is dhihin cilmi kuuma dhinna Nabi Muuse (C.S) Isagoo Nabi Alle soo diray ah ayuu halmar yiri anaa ugu cilmi badan.waxaana loogu jawaabey cilmi badnaan iskadaaye Addoonkeyna Qadar ah ayaa kaa cilmi badan. Marka sidaa darteed markasta ha is cajabin adiga.

Xeeladda 8-aad

ISXILQAAN"

Meel aad madaxeeda tahay Majaheeda la iskama dhigo."

Haddii aadan adiga sabab u noqon hormarkaaga ogow waxaad sabab u noqon doontaa hoos u dhacaaga.

Isxilqaanku waa inaad wax kasta oo kugu waajibay inaad ka soo baxdo duruuf kasta oo jirta aanay kaa hor joogsan, caqabad kasta ama dhib

Almaz Books

kasta oo kaa hor yimaada aanad u joojinayn, dibna aanad u noqonayn ilaa guushaada aad ka soo taabato.

Haddii aad sugayso in lagu adeejiyo Ogoow wax lagaaga horeeyay waxaan ahayn ma gaari doontid.

Haddiise aad adigu is adeejinayso wax adiga kuu gaara ayaa laga yaabaa inaad gaarto.

Intii wax lagugu amri lahaa Adigu is amar oo shaqadaada ogsoonow.

Markaad Adiga is adeejisid cidna ma dhaleecayn doontid

Ha Sugin in lagu adeejiyee adiga is adeeji oo hormari Naftaada.

Xaal lagula og yahay xiiso maleh.

Haddii aad isxilqaantid waxaad ogaandoontaa faaiidada ku jirta masuulnimada.

Xeeladda 9-aad

. RAJO SAN

Rajada sani waa waxa ku tusayo mustaqbalka waxaad noqon lahayd qofkasta oo guul inuu gaadho rabo waxaa laga rabaa waxaa uu doonayo inuu guul ka gaaro inuu dhinaca fiican ka eego rajaystana wax fiican oo uusan ka eegin dhanka taban ama xun maxaa yeelay hadii waxaa aad rabto inaad ku guulaysato aad ka eegto dhanka xun waxay noqonaysaa baasaysi. baasaysiguna waxa uu ka midka yahay asbaabaha ugu waawayn ee kuu diidan inaad noloshaada ka gaarto guul aad ku

Almaz Books

faraxdo.Waanaḍ Sameyn kartaa rajadaada inaad rumayso kaliya waxaad la Timaadaa dadaal iyo dulqaad iskana ilaali baasaysiga.

'rajadu waa awoodda lagu arko inuu jiro iftiin aanu sameyn dhamman gudcurku.'

_desmond tutu

Sheeko gaaban.

Gabar ayaa dalka sucuudi carabiya ku ogeed aabaheed oo xanuunsan. maalinkasta waa ay la xiriiri jirtay Maalintii dambe ayaa loosoo sheegay in Aaḃaheed aad u xanuunsan yahay oo ay Isbitaal loo qaadey. Iyadoo walwalsan ayay iska seexatay . goor habeen bar ah oo Saacaddu 12: 00 Habeenimo wax dhaafsan tahay, ayuu telephone kii guriga soo shanqaray, markay Numberkii eegtay aragtayba waxay aragtay in uu numberku yahay number sucuudiyaan ah.

isla markiiba intay istaagga iska tuurtay ayay Oohin iyo ba'ayeysi isku dartay.

Ninkii qabey oo meesha joogay ayaa numberka qabtey wuxuuna ogaadey in Uu ṇumberku soo qaldamey .

Hadaba dhibkaa iyo naxdintaa haday isdajiso ma qabsan lahayd ?

Almaz Books

Sheeko gaaban.

Waxaa jiray nin 4 nin iyo faras lahaa.

maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa ka lumay faraskii. dadkii deegaanka ayaa u yimaadeen waxayna ku dheheen : " Haddii uu faraskaagi dhumay maxaa ka leedahay ? " wuxuu ku yiri " qayr ahaana ma ogi dhumitaankiisa " Maalintii dambe ayuu faraskii soo laabtay isagoo Faras Habar ah kale wata . waxaa lagu yiri Faraskaagii Maanta waa kuusoo laabtay isagoo mid kale kuu keenay ee maxaad ka leedahay " Shar ii ahaana ma ogi " Daqiiqado ka dib farastii Ayaa Wiilka haraatisay oo lug ka jabisay. Dadkii ayaa u yimaadeen waxayna ku dheheen " Maantana wiil ayay kaa jabisay farastiiye Maxaad ka leedahay ?"

Wuxu ugu jawaabey " Qayr ahaana ma ogi " Daqiiqdo ka dibna Ciidan ayaa yimid waxayna Uruursadeen wiilashii waxayna ka tageen kii jabnaa"

sheekadaan waxay na tusaysaa in wixii la rajeeyo ay inta badan dhacaan

marka sidaa darteed wax wanaagsan rajeey.

Almaz Books

Cutubka 3-aad

WAQTIGA

Almaz Books

Oraahyada Waqtiga:

(waqti lumiska waa is dilid ama isdaldalid waqti dheer qaadata, waana fal danbiyeed qofka uu ku dhaqaaqo ayadoo lala gabaneynin cidan laga cabsanaynin qofkii galena aanu ciqaab muteysaneynin, qofkii waqtigiisa dila run ahaantii waxuu dilay naftiisa!!)

yusuf qardaawi

(Waqtiga wuu socdaa ...waan ka xumahay ..... anagana waan soconaa)

hennery ostin

(waxaan heleynaa waqti badan markii aan naqaano sida aan u adeegsano) Basmaark.

Waqtigu waa nolosha

walaalkay/walashay waqtigu waa shayga ugu qaalisan ee qofka Muslimka ahi haysto,Waa nimco aad u wayn oo llaahay ku galadaystay bani aadamka,Waa fursad uu qofku ku kasban karo Saacadada aduuniyo tan aakhiraba,waa jaanis qofka sida ay tahay ugu faaidaystaa uu ku gaadhayo liibaanta Aakhiro, Waqtigu waa raasamaalka nolosha bani aadamka, waa cumriga qofka bani' aadamka, waa waxa ay ka kooban tahay nolosha baniaadamku waayo cumriga qofku waa ayaamo, Saacado iyo Daqiiqado laysku geegeeyay. hadii ay maalin dhaafto waa waxka go' an cumriga qofka. Waa xaqiiqda lahubo ee hadii ay kaa tagto amaku dhaafto aan dib usoo noqonahayn, waana waxyaabaha waqtigu lagaarka yahay. Waa halka dadka guulaystay iyo kuwa khasaaray ku kala tageen, kii waqtigiisa kafaaidays tana guulaystay kii dayacayna khasaaray. Hadaba walaalkay/walalshy waqtiga aan haysanaa waa mid

aad iyo aad u kooban qofkastana waxa uu waqtiga dhexdiisa beerto ayuu goosanayaa aduunka dhexdiisa iyo maalin ka aakhiraba.Walalkay aduunku maaha wax waqtigeena aynugalino waayo ayaamo kooban oo dhamaanaya laakiin halka larabo inaan sahay fara badan uqaadana waa aakhiro iyo nolosheena dambe. Diinteenuna aad iyo aad ayay inoogu dhiirigalisay kafaaidaysiga waqtiga.Waqtiguna waxa uu kamid yahay waxyaabaha uu llaahay kudhaartay waayo hadaad ufiirsato ayaa dahana:⍰ llaahay wuxu ku dhaartay waqtiga guud ahaan iyo qaybo qaybihiisaba waxa ay natusaysaa ahmiyadiisa iyo qiimaha uu leeeyahay.Inta aad waqti haysato ayaad wax ka faaiidaysan kartaa, booskii faaiidada maanta ayaad joogtaa barri maya.

Kuma dhihin kumana dhihi doono waxaas berri qabo, waayo barri adiga ma lihid. Daqiiqaddaan aad fursadda haysatid ka faaiideyso.

wax la dayaco waxaa ugu xun waqtiga waayo kuu soo laaban maayo hadana wuu kugu marag furi doonaa.

Nebigeenu (SCW) waxa uu xadiis ku yiri :(kafaaidayso shan inta aanay shan ku soogaarin

1 : noloshaada ka horgeerida2 : caafimaadkaaga ka hor xanuunka

3 : dhalinyaranimadaada ka hor inta aana gaboobin

4 : firaaqadaada ka hor intaaanad mashquulin

5 : qaninimadaa ka hor faqiirtinimo...)

Dhamaan nimcooyin kan shanta ahi way dhamaanayaan laakiin qofka garta qiimahooda iyo sida ay qaali u yihiin

Almaz Books

ee ka faaidaysta waa mid liibaanay, guulaystayna. ka dayacana waa mid ka qoomameyn doona maalin aanay murugo waxba tarahayn dhaafeena nimcooyinkii jaanisdambana u dalban doono laakiin aan lagayeelayn Waqtiga maalinta qiyaame waalays waydiinayaa wixi aad kusoo dhamysay khaastan dhalinyaranimada oo ah marxalada ugu muhiimsan cumriga qofka. Waqtigu wax la weydiin doono dadka ehlu naarka ah laguna dhihi doono waqti iyo jaaniskii laydin siiyay hadii aad acmaal saalixa soo shaqaysan lahaydeen ma gasheen naarta.

Maxaa waqtigeena lumiya?

Bal aan isku dayo inaan ka jawaabo weydiintaan qofkii si sax ah ugajawaaba si wanaagsana ugu dhaqma uu liibaaney uuna ku guulaystay in uu waqtigiisa ka faaiideysto, Mar haddii aad ku guulaysato inaad ka faaiideysato waqtigaadana waa hubaal waad ku guulaysatay noloshaada haddii aadba si sax ah dhammaan waqtigaaga uga faaiideysatey.



Ilaahey (S W) ha inaga dhigo kuwa sida saxda ah uga faaiideysta waqtigooda.

Waa maxay waqti cunaha aana la ogayn oo waqtigeenna muudsada ?

WAQTI DILAHA UGU WEYN.

Waqti dilaha ugu wayn ee maqtigeena muudsada waa : SOCIAL MEDIA Waa aafo madoow oo Qof nimadaada iyo fursaddaada muudsanaysa waa god madow oo mustaqbalka qofka dayacaysa Noloshana ka rideysa, Hoosna

Almaz Books

u dhigaysa hal abuurkiisii iyo Xikmaddii noloshiisa. Haddii uu qofku u isticmaalo sida Aan badan keenu u Isticmaalno oo ah iska dul fadhiga anagoo aana wax miro ah ka dhalinayn, ama aana waxba ku qabsanayn.

Ogow waxaad gaari doontaa heer aad adiga mustqbal kaaga ilkahaaga ku rifto.

Hadaba Akhristahayga sharaftalahoow

marna ha u ogolaan in uu SOCIAL MEDIA ku hogaamiyo oo uu noloshaada isagu go'aan ka gaaro.

Waqti dilaha labaad

In la isku boojeeyo gaym (Game) ama wixii la halmaala Sida ciyaar daawasho, Filim (Film) ama Musasal .

Dhalinyarada 90% Waa taageero ciyaareed.

Sow sidaas maaha ?

Maxaa faaiido ah oo ka dhalanaysa in aad taageerto qof aan taageeradaada ogayn haddii uu ogaadana aana waxba kaasoo qaadeyn, inaad taageerto iyo in kaleba aana kala jeclayn. Haddii aad taageerto oo waqti iyo Tamarba ku lumisid oo hadana aadan waxba faaiidin maxaad ka heshay ? Aduunka waxaa ugu xun wax aana faaiido kuu kordhinayn oo hadana waqti iyo lacag kaa luminaya.

Hadaba akhristoow haddii aad taageere tahay maxaa Faaiido ah oo aad iiga sheegi kartaa in ciyaar la daawado ama Musasal amaba Film. ? Haddii aad iiga sheegtid faaiido dhaxal gal ah oo iiga fiican in aan sameeyo qodobadaan soo socda, oo sida ay Naftayda u hormarinayaan

AlmaZ Books
Telegram

Almaz Books

u hormariya naftayda. Qodobadan aan uu sheegi doono naftayda ayay hormariyaane haddii aad adigu Qodobo kuwaan ka fiican aad ku dhex aragtay Ciyaarta, Game ka , Filmka / musasalka.

Fadlan iisheeg haddii aadan haynina aniga igu raac oo ila arag faaiidada aan haysto kana soo tag kuwii hore ee aad ku fashilantay : Qodobada aan hormarka ku arkay ila fiiri :

1) Alle ka cabso meelkasta oo aad joogto

2) Cibaadada ku dadaal

3) Beenta iska ilaali

4) Salaadda xafid

5) Waqtigaaga jadwalayso.

6) Qur'aanka kariimka ah Saaxiibka dhigo.

7) Qofka aad la saxiibeyso Alle ka cabsigiisa fiiri.

8) Cilmiga raadso Buugkasta / Maqaalkasta / iyo qoraalkastaba akhri.

9) Dadka dabeecad wanaagsan kula dhaqan.

10) U naxariiso Addoomada Alle Si alle kuugu naxariisto

11) Marnaba ha taageerin Mid adiga cadowgaaga ah (Gaalka).

12) Cafiska badi Cuqdadna marnaba ha is galin.

Qodobadaan haddii ay ka fiican yihiin kuwa laga helo filimada iyo wixi la hal maala fadlan ku dhaqan oo tixgali.

Almaz Books

Waxaad ogaataa in ciyaarta gaymka, filimkuba iyo musasalkaba ay yihiin wax Shaydaan ku adeegto oo qofka uu waqtiga uga lumiyo si uuna uga faaiideysan waqtiga qaaliga ah ee uu haysto.

Haddii waxaan aan soo sheegnay aanay ahay wax dhalin yarada waqtiga looga dilaayo, Maxaa loosoo saari waayay wax odayaasha iyo habraha mashquuliya ?? Maxaa dhalinta uun loogu mashquuliyaa ??

Bal fikir adiga Maxay ciyaar yahanada Ciyaarta uga fariistaan markay 30 kor u dhaafaan ?

Muhikmadda aan ka leeyahay qormadaan yar waxaa weeye in aan helo dhalinyaro badan oo ka fikirta mustaqbalkooda. Marka qofku uu tiisa anfaco ayuu mid kale ku dari karaa.

Si aad u hormariso Naftaada Ilaali Daqiiqadaha kusoo mara.

MAXAA GACANTAADA SAACADDA KU XIRAY ADOO GURIGA DHIGAN KARA ?

muhiimadda Saacadda gacanta loogu Xiray ayaa ah in waqtiga si fudud loola socdo daqiiqadkastaana meesha la joogo iyo waxa qabatay lagu ogaado.

adiga sidaas ma u isticmaashaa saacadda waqtigaagana Saasma uga faaiideysataa ?

Maxaa kuu diiday ? Sowma ogid in daqiiqad kastaa kugu marqaati furi doonto maalinta Amuurta darani jirto ?

Almaz Books

Akhristoow Saacaddaan wixii ka dambeeya Saacadda gacantaada ku xiran u isticmaal mid waqtiga inaad ilaaliso kugu dhiiri galisa.

Qarnigu wuxuu ka kooban yahay Sanaddo

Sanadkuna waxaa uu ka koobam yahay Bilo

Bishu waxay ka kooban tahay Isbuucyo

Isbuucyaduna waxay ka kooban yihiin Maalmo

Maalmuhu waxay ka kooban yihiin Saacyo

Saacyaduma waxay ka kooban yihiin Daqiiqado.

Daqiiqaduhuna waxay ka kooban yihiin Ilbiriqsiyo

Xikmadda halkaa ku jirta ayaa ah in aad isweydiisay midkii ku dhaafaba inta aad uga faaiideysatay iyo wixii aad ku qabsatay.

Waa maxay sababta aan waqtiga u ilaalinayno ?

Aan ka jawaabo su'aashaas inta garaadkayga ah :

waa si aan ugaarno yoolkeena iyo hadafkena waynoo janno ah.

HADALADII DADKII WANAAGSANAA EE KU SAABSAN WAQTIGA:

Saxaabigii Cabdullaahi ibnu mascuud (R.C) wuxu yiri :

"waligay kamaan murugoon intaa aan ka murugooday

maaalin Idhaaftay cimrigaygana ka go' day misna camalkaygu aanusiyaadin"

Ibnu qayim isna wuxuu yiri "waqtiga oo la dayaco ayaa ka daran geerida"

Mar kale wuxu yiri "waqtiga oo la dayaca waxay tusaysaa in adoonka ilaahay kajeestaydana aan u kalahayn"

Sida loo maareeyo waqtiga :

Waxaan ku maarayn karnaa Waqtigeenna in aan uga faaiideysanno

Cilmiga naafica ah ee qofka wax u taraya aakhiradiisa iyo aduunkiisaba. Camalka saalixa ah.

.Dacwadda diinta Alle (SW).

La xisaabtanka nafta.

Akhriska Qu'aanka Kariimka ah iyo dikriga Alle (SW)

Caawinta iyo la shaqaynta waalidiinta iyo walaalaha.

Ushaqaynta waalid ,qaraabo xiriirinta iyo booqashada dadka xanuunsanaya.

Masaajidda oo la Camiro oo wax laga faaiideyso khayraadka ka socda.iyo salaadaha oo jamaacada la xaadiro.

Akhrinta iyo raadinta Qoraalada Faaiidada leh, baaritaanada iyo

dhagaysiga waxyaabaha faaidadaleh.

Xaadiridda xalaqaadka cilmiga diiniga ah.

Caawinta dadka tabaalaysan inta aad awoodid.

Almaz Books

Iyo camal kasta oo waxtar u leh naftaada, diintaada, dalkaaga, umadada, Aduunkaaga iyo aakhiradaada.

Maxaa kugu caawinaya ka faaidaysiga waqtiga?

Garo qiimaha uu leeyahay waqtigu.

Hadaf iyo yoolcad oo aad xaqiijinayso hadafkeena Ugu weyn waa janno, Jannaduna wallaahi waa qaali.

La saaxiib dadka wanaagsan ee waqtiga ilaaliya dhawrana.

Xasuuso geerida iyo in waqtiga aad haysataa maalmo yar.yahay.

Xusuuso in aada dhimandoonto cimrigaaguna gaaban yahay.

Samayso jadwal nafeed aad ku xisaabinayso naftaada arrimahana ku kala horay siido sida ay u kala mudanyihiin.

MAAMULIDDA WAQTIGA

Haddii aad u Maamusho Waqtigaaga sida ugu wanaagsan ogow waxaad xaqiijisay tilaabada ugu muhiimsan ee guusha lagu gaaro. Inaad guulaysato waxaa kaa xiga inaad waqtiga iska dhicisid. hal mid oo aan hubo ayaa ah in Waxa guuldarada horseeda uu yahay Waqti muhiim ah oo aad dayacday Haddii aadan Waqtiga dayicin waad guulaysatay. balse hadaad waqtiga dayacdo guuldaro ayaa daris la tahay. Dadka guulaystay wax kale ma sameyn kaliya waxay ilaaliyeen waqtihii ay dadka kale dayaceen.

Hadaba Akhristoow ma og tahay in waqtiga oo la dayacaa uu keeno Cadaab xagga alle ka ahaada, Sababtoo ah qofka aana adduunka ku cibaadeysan aakhirana waxba uma yaaliin Cadaab mooyaane. Qof aana

Waqtigiisa ka faaiideysanna Ma cibaadeysan. Waayo Waqtiga aad cibaadeysan lahayd waa dayacday.

Ma kuu sheegaa hal hab oo aad waqtigaaga ku maamuli marto ??

Haddii aad haa iigu jawaabtey kaalay Sameey sida aan sameey ku dhaho.

1) Sameyso jadwal Aad ku shaqayso. oo Dhammaan Shaqooyinkaaga iyo wax qabad kaaga ay ku qoran yihiin. Wixii noloshaada Quseeyaba laga helaayo Sida : Shaqadaada, xiliga aad shaqada aadeysid, Xiliga nasashada, inta daqiiqo ee aad nasasho maalintiiba isku ogoshahay, Inta howlood oo aad maalintii qabanayso iyo sida aad u kala hormarinayso.

Samaysashada jadwal nololeed waa ilaalinta waqtigaaga noloshaada oo dhan.

Si aad u hormarisid naftaada hormari hab u socodka waqtigaaga. waakan jadwkayga kaasoo aad ka baran karto soda loo sameeyo.

Almaz Books

CAADOOYINKA AY DADKA GUUL DARRAYSTAA CAAN KU YIHIIN

1). Maahsanaan mar kasta ah –

Dadka had iyo jeer guuldaraysta waa dad maahsan, Oo aana la socon meel la maraayo iyo wax dunida ka jiraba. Waa war moɒg ama Sida la wada yaqaano (Lax dhukani col iyo abaar moog)

Waxa laga yaabaa in aanu qofku warba ka hayn waxa deegaankiisa ka dhacaya iyo wax arriga ka socdaba. Waxaa laga yaabaa in uu iskuulka ama jaamacadda waxa cashar la qaadanayo iyo waxa tartan socdaba aanu war ka hayn. Hadaba qofka nuucaas ah mala tartami karaa oo meel ma iska saari karaa qof sanadkii uu qofkaan dansanaayba Shaqaysanayay oo xaaladda jirta iyo meel kastaba xug ka haaya ?

Qofka Maahsan sidaas ayuu inta badan u guuldaraystaa ayaan dhihi karnaa.

Adigu noqo ruux dhugmo leh

Haddii aad tahay qof dhugmo leh waxaad awood u helaysaa in wixii aad doonaysay warbixin tooda aad dadka ka heshid adiga oo aana juhdi dheeraada bixin. Tusaale ahaan haddii aad rabtey in aad Akhriso buugaagta Rafiiqi waxaad si fudud uga helaysaa dadka oo ka sheekaynaya buuggaagta rafiiqi dadka aad arkayso dhammaantood waa wariye yaal waxayna ka sheekeeyaan wixii soo kordha. Tusaale ahaan haddii maanta la arko gaari duulaya barri dadka oo dhan gaarigii ayay Warkiisa hayaan. Marka si wixii aad dooneyso waad wax uga ogaatid dadka ka warayso Adiga oo isticmaalaya qaacidada aana la wada isticmaalin oo xugta lagu raadsado taas oo ah.

QOFKA WARKA CINWAANKIISA SII KA DIBNA KA AAMUS OO SI DADBAN JAWAABTA UGA SUG.

Si aad u hormarto Iska ilaali dhoohnaanta (Maahsanaanta)

2. Qorshaha uu damacsanyahay Oo laga sheekeeyo

Baadida ninbaa kula daydaya daalna kaa badane oo inaad heshaa doonahayn Daain Abidkaaye

Dadka guuldaraysta markasta iyaga ayaa sirtooda iska fashilaan mar haddii ay dadku ogaadaan waxa uu doonayo Qofkuna dad badan ayaa raadinaya waxa uu raadinayo kuwaas oo iyagana raba in ay helaan

Waxa uu qofkaasi raadinayay.

Sidaas darteed qofka waxaa lagu bilaabayaa in wajiyo badan lagasoo galo. Tusaale In la niyad jabiyo.

In la hagrado In la mucaarado. Marna qofku haddii ay intaas iskugu tagaan wuxuu halis u yahay niyad jab haddii uu niyad gabana waa isdhiibey haddii uu isdhiibaya fashilmayba.

Taas ayaana keentay in qofka sirahiisa ka sheekeeya aanu ku guulaysan.

– Riyadaada marka aad rumayso uun dadka tus.

Adigu riyadaada qarso Sababtoo ah Saddexdan qodob ayaad faaiideysaaye.

1) In aanay qofna kaaga hor marin

2) Marka aad guulaysato in ay dad badan macquul la noqon weyso.

3) In aanay qofna ku dhiirran karin in ay ku niyad jebiso.

Sirtaada marka ay kuu qarsoon tahay, adiga kaliya ayaa og haddii ay arrintu kugu adkaato gadaal ayaad u dhigan kartaa balse haddii ay dad badan kula ogyihiin ma sameyn kartid wax dib dhigasho ah Sababtoo ah waxaa laga yaabaa in ay kaa

Almaz Books

faaiideystaan oo ay iyagu ku guulaystaan wixii aad adiga dib u dhigatay oo aad isleheed aad mar kale sii wadatid.

3. Waqti lagu lumiyo dad aan u qalmin –

Waxa Tacab la galiyaa Ruuxa talo ku siin kara tiisana ku meel mara.

Dadka qaar waa sida Tixsi, waxay diyaar u yihiin in ay wax kaa lumiyaan sida tixsiguba uu u jecel yahay in uu cudurku faafiyo dadka. Dad ayaa jecel in ay adiga waqtigaaga qaaliga ah kaa lumiyaan si aad ula mid noqotid.

Haddii aad Qof waqti siinaysid ka hor inta aadan waqti la qaadan is weydii intaan :

1) Waqti intaas la eg haddii aan siiyo muxuu igu soo kordhin karaa ?

2) Maxaan anigu u kordhin karaa ?

3) Labadeenna haddii aan iskutagno yaan wax u kordhin karnaa.

4) Maxaa iga dayacmaya haddii aan waqti siiyo

5) Muxuu igu Sababi karaa ?

intaas marka aad isweydiisid jawaabta kuusoo baxda ku howl gal.

waxaan filayaa in aadan ku hoogi doonine.

Haddii aad qofkasta waqti siisid ogow waxaad noqonaysaa tixsi oo kale oo meel kasta laga helo qofna aanay rabin.

Mar mar dhif ah halagu arko markii lagu arkana saameyn ka tag.

Kuma dhahayo dadka iska qari ee waxaan ku leeyahay Dantaada ku mashquul oo Maala yacniga jooji.

ka agdhowoow dadka kugu dhiirrigelin kara hiigsiga aad leedahay.

Dadka qaar waa sida Shinida

Markii la arko dantooda ayay Mashquul ku yihiin. Meel kastana ma joogaan. Haddii la arkana saameyn ayay ka tagaan.

Cidna ma gardaraystaan Qofna si qaldan ulama dhaqmaan. Qofkii soo fara gashadana Dhib uu waligiis ka sheegto ayay gaarsiiyaan.

Qofkii u soo baahda ee sida saxda ah ula dhaqmana Talooyin Macaan oo wax ku ool ah ayay siiyaan. halka shinida ay malabka ka bixiso.

Hadaba ka agdhawoow kuwaan Ulana dhaqan sida saxan wax badan ayaad ka faaiidi doontaaye ia

4. Niyadxumo

Had iyo jeer guusha waxaa lagu qiimeeyaa halka aad uga niyad jabtay wax qabadkii

Dadka qaar haddii ay inbadan shaqo wadaan ee ay ku guulaysan waayaan waa ay ka niyad jabaan iyadoo ay ugu wacan tahay: Hamigooda oo liitay iyo waxa ay higsanayeen oo aanay xug badan ka haysan.

Haddii ay Hurdadu kula dheeraatey oo ay kuu suurta gali weysay inaad aragto ilayskii subaxnimo ee qorraxda ha niyad jabin ee Dadaal waxaad arkaysaa Ileyska Dayaxee.

– Mar haddii halka aad u socotaa ay kuu caddahay yaanay ku niyadjebin turaanturooyinka ka sokeeya hiigsigaaga.

Almaz Books

Haddii ay qorraxdii kaa tagtey oo uu mugdi kusoo dhaweeyey ha niyad jabin Cadceed iftiin badan ayaa ka dambeysa Saacadaha mugdiga ahe.

5. Cagajiid –

Dadka qaar ka mid ah waa ay caga jiidan waana caajis wadeyaal Taasina waxay ka dhigtaa inay guuldaraystaan oo Hilinka guusha looga hormaro.

Howl saacaddeeda joogta Sabti nabad ah looma riixo

Hawl aad maanta qaban karto beri ha u dhigin.

Adoo awooda inaad Daqiiqado uun shaqayso maxaa Saacado shaqaa kuu diray haddii ay isku mid yihiin

Daqiiqadaha kusoo afjar wixii saacad kaa cuni lahaa.

6. Dhegeysi la'aan

dhagtaada Dhallin waa kaala fac laakiin dhagaysi ayay ku dheer tahay.

Dhallin waxaadan ku gaarin dhagaysi ku gaar

Dadka qaar ka mid ah ma dhagaystaan dadka kale waanadooda iyo talooyinkooda waaya aragnimodaleh.

sidaas ayaana sababta in aanay guulasysan Sababtoo ah Guulaysta yaasha waa dhagayste yaal wanaagsan.

– Dhegeyso dadka ereygoodu niyad ahaan ama ficil ahaan kaa caawinayo in aad u dhowaato hiigsigaaga.

Dhagayso dhammaan erayada ka soo baxaya qofkasta oo waaya arag ah. Sababtoo ah wax aadan aqoon ayuu yaqaanaa.

7. Fiiro la'aan

Dadka qaar ka mid ah ma raadiyaan wax aqoon ah iyo wax waaya aragnimo ah. Waxayna jecel yihiin in ay dadka ka celiyaan

– Baare wanaagsan noqon oo raadi aqoon iyo waayo-aragnimo ka duwan inta aad awoowyadaa ka dhaxashay.

8. Is-dhiibis –

Thomas Edison oo ahaa hal-abuurkii ikhtiraacay dab-dhaliyaha korontada, qulqulka war-is-gaadhsiinta, mishiinka cod duubista iyo dhaqaaqa sawirrada iyo qalab badan oo muhiim ah, ayaa sheegay in jidka ugu fiican ee guusha loo maraa uu yahay, in waxa kaa qaldama aad mar kale ku celiso.

Guuldarrada kugu timaaddo casharro ka baro oo mar kale ku celi dadaalkii aad guul ku gaari lahayd

Marnaba ha isdhiibin Xitaa hadad Ay wada burburaan dhammaan riyooyinkaaga mustaqbalka Waayo ILAAHEY (S W) dhulka oo abaaroobey oo geedihiisii iyo dhirtiba burbureen ayuu soo nooleeyaa, Quruumo mar hore la halaagey ayuu soo sooleeyaa. Adna sidaas oo kale riyooyinkaaga burburay dib ayuu kuugu dhisi karaa ee Ilaahey baryadiisa ha ilaawin.

Almaz Books

Waad guulaysan kartaaye ha is geesmarin guusha

Waa in aad horay u socotaa ilaa aad ka guulaysatid

Cutubka 4-aad

RAAXADA NOLOSHA

Almaz Books

Noloshu waa inta ay beenleydu (Naftu) kugu jirto oo aan lagaa qaadin. waa hubaal waa lagaa qaadayaa laakiin waa goormee marka lagaa qaadaayo ?? Cidina ma oga Allah (SW) Ayaa waqti magacaaban u sameeyay. waqtigaas ayaana lagaa qaadayaa. Hadaba inta aan laga qaadin maxaa kugu waajib ah inaad sameyso.Waxaa kugu waajib ah inaad ku shaqaysato ka hor inta aan lagaa qaadin.

Inaad camal Saafi ah ku sameysato inta aanay kaa tagin fursado muhiin ah.

Hadaba waxaa muhiim ah in waqtiga gaaban ee aad nooshahay aad si wanaagsan u noolaato oo waxyaabaha waqtiga kaa dilaaya kadibna murugada kugu dhalinaya aad iska saartid.

Si aad taas u sameyso oo aad u wanaajisid isticmaalka iyo ka faaiideysiga fursadahaaga raac tilaabooyinkaa iyo Talooyinkaan hoos ku qoran waa hubaal waad ku liibaaneysaa haddii alle S w Doonee.

Hadaba hadii aad dooneyso inaad noqoto qof ku raaxeysta nolosha aduunka oo mar walba faraxsanaada raac talooyinkan hoos ku qoran ee 20 talo;

1. Ha lagaa helo iimaan qalbigaaga buuxiya kuna shukri ALLAH markasta.

2. Wax tegay tiigsimaad ma leh, ha ka fekerin wixii ku dhaafay khaladkaaga kaliya cilmi ka baro.

3. Ku qanac Qismada iyo xukunka Alle,iyo risqiga lagu siiyeye, fiirina cida kaa hoosaysa ee ha fiiri cida kaa sareysa.

4. Badi baryada Alle iyo xuska nabi muxammad SCW.

5. Ka nadiifi qalbigaaga xasadka iyo xiqdiga Adoomada EEBBE.

6. Ku dedaal akhriska kitaabka Qur'aan kariimka ah, saaxiibna ka yeelo waa badbaadada aduun iyo aakhiro.

7. Nidaami howlahaaga nolol maalmeedkaaga shaqo, gurigaaga iyo meel kasta oo aad joogto kuna xirnoow ALLAH.

8. Ku dedaal socodka iyo jimicsiga,qalbiga fayow wuxuu ku jira jirka fayow.

9. Akhri buugaagta taariikhda ah si aad wax uga ogaato sooyaalka nolosha aduunku soo martay kana baro dadka kaa waawayn.

10. Ha badsan waxyaabaha ay ka mid yihiin; shaaha,kafeega, kana dheerow maandoriyasha qaadka, khamriga iyo daroogada inteeda kale.

11. Ku dedaal nadaafada maryahaaga iyo bilicda muuqaaga.

12. Xusuuso in Alle denbi dhaaf badan yahay.

13. Alle uga mahad naq nimcooyinka uu ku siiyey ee ay ka mid yihiin; araga, risqiga, ɗiinta,caafimadka,maqal ka IWM.

14. Ogow in dadka ay ka mid yihiin kuwa waayey caqligii,caafimaadkii,laxaadkii,.....

15. Ku dedaal akhriska qur'aanka,dhegeysigiisa ,xifdintiisa, waayo wuxuu quranku daawo u yahay xanuun kasta.

16. Alle talo saaro isaga ayaa kugu filane.

Almaz Books

17. Cafi qofka ku dulmiya, xiriiri ka ku gooya, u dulqaado ka kugu xad gudba.

18. Marna yaaney Ku dhaafin Jamaacada

19. Badi istiqfaarta, waxaad helidoontaa risqi, qalbi nadiif ah iyo wax walba.

20. Ku qanac muuqalkaaga, shaqadaada,

Dhaqaalahaaga , gurigaaga, ehelkaaga, ilmahaaga iyo wuxuu EEBBE ku siiyey. Alle mahaddiis.

Sirtu waa ku qanacsanaanta hadba wixii aad haysato

Si kasta oo dadyawga dunida ku nooli u kala duruufo duwan yihiin haddana waxa uu qof kastaa raadinayaa in uu helo nolol ka fiican tan uu haysto. Waxaana hubaal ah in aan laysku raacsanayn liibaanta adduunyada iyo halka u sarraysa ee uu qofku derejo ka gaari karo. Dad badan ayaa aaminsan in guusha noloshu tahay in aad lacag badan hesho. Waxa ay kuwaasi ku doodayaan in ay hantidu tahay furaha guusha iyo tan qofka u goyn karta wax kasta oo uu jecelahay sida: caafimaad, farxad, jacayl, xasillooni, madadaalo, raaxo, awood iyo wixii la mid ah. Taa beddelkeeda waxa sidoo kale dad badani isku waafaqsan yihiin in nolosha macaankeeda ama libinteedu aanay ahaynba in aad adduun badan hesho balse ay tahay in aad haysato caafimaad, wax aad cunto, hoy, nabad, xorriyad iyo qaneeco kuu horseedda in aad iimaansato hadba waxa aad haysato, dariiq fiicanna aad u marto wixii kororsiimo ah.

Almaz Books

Sheeko

Nin taajir ahaa oo Ilaahay duunyo badan siiyay ayaa beri dalxiis ku tegay tuulo yar oo meel xeeb ah ku taalla. Tuuladu waxa ay ahayd meel ay u soo tamashle iyo nasasho tagaan dadka lacaglayda ahi. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa isaga oo ninkii taajirka ahaa ku qorraxaysanaya badda xeeligeeda, waxa uu la kulmay nin kalluumaysato ah oo afar xabbo oo kalluun ah soo jillaabtay. Labadii nin way sheekaysteen, nin kastaana waxa uu ka waramay waayihiisa iyo waxa uu ku sugan yahay. Ninkii taajirka ahaa ayaa si wacan uga sheekeeyay hantida badan ee uu leeyahay iyo in uu yahay ganacsade weyn oo lacag badan haysta oo dalxiis ku yimid meesha. Intaa kadib waxa uu ninkii taajirka ahaa waraystay ninkii kalluumaystaha ahaa, waxaana dhexmartay sheekadan:-

– Imisa saacadood ayay kugu qaadatay in aad afartan xabbo ee malayga ah soo jillaabato?

– Waxa ay igu qaadatay saddex saacadood.

– Ma saddex saacadood oo kaliya? oo maxaad saacado badan u shaqaysan wayday oo aad kalluun badan u soo qabsan wayday?

– Maalin walba waxa aan soo qabsadaa intii aniga iyo qoyskayga nagu filan. Markaa afartan midh ayaa naga badan maanta.

– Oo haddii aad saacadahaan kooban oo qura shaqayso maxaad wakhtiga intiisa kale qabataa?

Almaz Books

– Qoyskayga ayaan wakhti la qaataa, asxaabtayda ayaan la kulmaa, ciyaaro iyo madadaalo ayaan wakhtiga in ka mid ah ku qaataa, inta kalena waan iska cibaadaystaa.

– Waan gartay. Ninyohow talo ayaan ku siinayaa. Kalluunka ka ganacso oo ka iibi dukaanada iyo makhaayadaha tuulada, waxaanad maalintii shaqaysaa 10 saacadood. Kadib magaalooyinka waaweyn u wareeg oo halkaasi ganacsi fiican ka bilow. Waxaad noqon doontaa taajir lacag badan haysta.

– Oo imisa sano ayay igu qaadanaysaa in aan lacag badan ku helo oo aan ganacsade weyn noqdo?

– Ilaa waxa ay kugu qaadan doontaa 25 sanno, waa haddii aad dadaasho. Kadib marka aad lacagaysato waad isaga soo guuri magaalooyinka waaweyn oo waxaad iska degi tuulo yar oo tan oo kale ah, maaddaama oo magaalooyinka waaweyni buuq badan yihiin. Tuulo yar oo tan oo kale ah ayaad fadhiga wax ku cuni, aanad wakhti fiican u heli qoyskaaga, asxaabtaada iyo wax kasta oo aad jeceshahayba.

Ninkii kalluumaystaha ahaa inta uu qoslay oo uu la yaabay sida ay noloshu giraanta u tahay ee halka uu maanta joogo uu ugu soo noqon doono haddii uu lacag kasta haysto ayaa ninkii taajirka ahaa ugu jawaabay:

– Oo ninyow haddii ay noloshu ugu danbaynta kuba soo ururayso intaan aan imika haysto maxaaban halganka intaa le'eg u galayaa oo aan aniga oo 60 jir ah ugu soo noqon tuuladii aan nolosha ka bilaabay?

Imika ayaaban haystaa nolosha intii aasaaska u ahayd, waana ku qanacsanahay.

Sheekadani waxa ay inna tusaysaa in noloshu kaliya aanay ahayn in aad lacag yeelato balse ay tahay in aad nolol xasiloon hesho. Waa mihiim in adduunyada si fiican looga shaqaysto balse sirtu maaha in qofku hadafkiisa koowaad ka dhigto sidii uu lacag badan u heli lahaa isaga oo wakhtigiisa oo dhan galinaya, una maraya jid kasta.

Muddooyinkan danbe waxa xoog isu soo dhawaaday dadyowgii dunida ee kala durugsanaa, waxaanay dunidii noqotay xaafad yar oo layska wada war hayo. Waxaana taasi fududeeyay aaladaha casriga ah ee maalinba maalinta ka danbaysa xawliga ku socda. Tani ayaa keentay in bulshooyin badan oo kala durugsanaa ay maanta is xaal ogaadaan, si dhib yarna u kala warqaataan. Waxa ay tani dhashay in badi dadka aalada casriga ah isticmaalaa ay dadka la wadaagaan waxyaabo badan oo noloshooda ku saabsan, iyaga oo mar walba wixii wanaagsan ee noloshooda ku soo kordha soo bandhigaya. Halka ay marar badanna buunbuuniyaan si ay asxaabtooda iyo dadka ku xiran u tusaan in ay nolol fiican haystaan.

Tani ayaa culays dhanka maskaxda ah ku keenta dadyow badan, kadib marka ay arkaan sawirrada iyo muuqaallada quruxda badan ee ay dadka kale soo dhiganayaan, waxaanay is waydiiyaan sababta ay iyagu noloshaa quruxda badan u heli waayeen. Sida ay cilmibaarayaashu qirayaan dhallinyarada ayaa ugu badan kuwa uu dhaawaca ugu weyni soo gaaro, waayo aad ayay isugu faanaan mid kastaana waxa uu soo dhigaa hadba shayga noloshiisa ku soo kordhay. Sida, dhar cusub, gaari,

Almaz Books

cunto, xafladayn, dalxiis, carruur, guur iyo in badan oo kale. Marar badan waxa dhacda in qofka waxyaabahan quruxda badan soo dhigayaa aanu farxadba haysan balse uu haddana dadka kale waalayo, isaga oo ka beensheegaya noloshiisa dhabta ah iyo waayaha uu ku sugan yahay.

Hadal iyo dhammaan, liibaanteed adduunyada ninna laasan maayee, waxa mihiim ah in aynu ogaano in aanay noloshu kaliya ahayn in aad hesho lacag badan balse ay tahay in aad hesho qaneeco iyo dadnimo wanaagsan taasi oo kuu horseedda aqoon, lacag iyo degganaansho. Yaanu hadaf kaagu noqon maxaad adduun dhaqataa adiga oo xaaraan iyo xalaalba u maraya, balse ha noqdo maxaan dunida ku soo kordhin karaa? Hadba ku qanac inta aad hayso, waddo wacanna u mar inta kaa dhiman. Yoolkaagu ha noqdo maxaan maanta nolosha ku soo biirin karaa iyo sideen u caawin karaa inta jilicdasan ee aniga iga liidata. Ku kalsoonow noloshaada, dadaalna u mar halka aad hiigsanayso. Yaanay noloshaada hagin ama oo ayna dhaawac u gaysanin hadba wax ay hebel iyo heblaayo haystaan. Ilaahay ugu mahadceli nimcooyinka badan ee aad haysato, waydiisana inta kaa dhiman adiga oo dadaal ku daraya.

Abwaankii weynaa ee Maxamuud Tukaale ayay suugaantiisa ka mid ahayd intani:

Ha ka deyrin waligaa

Noloshaad la deris tahay

Ha doodin abidkaa

Mid kaloo ku dayasho ah.

Talooyin ku caawinaya

Talooyin kaa caawinaaya in aad shaqada kuu taal waqti gaaban ku dhammayso.

Cagajiid iyo niyadda oo aaminta in shaqadu ku badan tahay ayaa ka mid ah sababaha dib u dhaca ku keena hawlqabashada qofka. Mark Twain oo ahaa qoraa iyo macallin jaamacadeed caan ahaa oo u dhashay dalka Maraykanka ayaa mar uu dadka ku dhiirrigelinayey sida ugu habboon ee ay uga fogaan karaan ka cagajiidka shaqada waxa uu reebay hal-ku-dheg macnihiisu ahaa, "Subaxda hore raha nool cun, wax ka xun oo maalinta inta haray aad la kulmi doontaa ma jiro"

Twain waxa uu ogaa in aanay jirin hawl ka xun in qofka shaqo looga dhigo in uu rah nool cuno, laakiin haddii shaqadaadu ay taas noqotay, hore isu dhaafi oo weliba hadday laba rah yihiin ka weyn ku bilow subaxda horeba ayaa ay taladiisu ahayd. Haddii shaqada laguu diray teeda ugu dhibka iyo yaq-yaqsiga badan aad ku bilowdo maalintaada inta aanad hawlkalaba u jeedsan, ayaa keenaysa in shaqooyinka kuu haray oo dhami noqdaan kuwo naftu ku dhiirrato oo weliba iyada oo ka raalli ah ay dhaqso u samayso.

Qoraagaa iyo dhiirrigeliyaha horumarinta nafta ee lagu magacaabo Brian Tracy ayaa si qoto dheer u sii lafaguray, halkudheggan cunista raha, isaga oo weliba qoray buug uu isla rahan la cunayo sumad uga dhigay. Buuggiisa 'Eat that Frog' (Rahaas cun) oo ka mid ahaa buugaagtii waqtigiisii loogu iibsiga badnaa, ayuu ku soo bandhigay habab aad u heersarreeya oo lagaga hortegi karo cagajiidka iyo culayska marar qofku dareemo ee shaqada dib dhiga.

Almaz Books

Brian Tracy waxa uu magacan buugga ka soo qaatay , halkudheggaas uu ka tegey Mark Twain ee ahaa "Subax kasta cun rah nool, wax ka xun kuguma dhici karo maalintaas inta ka hartay" oo uu ka wado in hawsha ugu foosha xun ama ugu dhibta badan oo aad waajibaadkaaga shaqo ku bilowdo, adiga oo weliba nafta ku qasbaya in ay qabato, ay keenayso in hawlaha kale ee maalintaas kuu yaallaa ay nafta ugu muuqanayaan kuwo sahal ah oo ay dhaqso u qaban karto.

Ugu horeyna Tracy oo sharraxaya sababta uu magacaan ugu xushay buuggiisa, ayaa ku sheegay ujeedada raha cunistiisu in ay tahay in nafta aad ku qasabto hawsha ay ka cagajiidayso oo weliba aad caado ka dhigato in shaqo kasta oo kuu taalla aad ka bilowdo qaybteeda ugu dhibaatada badan ama naftu qabashadeeda diidayso. "Dadka guulaysta ama waxtarka yeeshaa waa kuwa shaqadooda qaybta ugu muhiimsan toos u bilaaba, ee naftooda ku qasba in ay si deggen oo maskax iyo Samir leh u waddo shaqadaa illaa inta ay ka dhammaystirayso" ayaa uu qoray Tracy.

Talooyinka muhiimka ah Ee ay tahay in aad si joogta ah u isticmaasho.dhaqangaliso.

1. MIISKA DIYAARI

Marka koowaad naftaada la go'aami waxa aad dhab ahaan u baahan tahay in aad qabato, ama hawlaha kuu yaalla iyo halka aad hiigsanayso in aad gaadho. Kaddib warqad ku qor hawlahaas oo aad u soo kala hormarinayso sida ay kuugu kala muhiimsan yihiin, adiga oo aan eegayn sida ay u kala fudud yihiin. Hawl kasta waxa aad ku hor qortaa taariikh aad doonayso in aad dhammaystirto ama in aad gaarto ujeedkaas.

AlmaZ Books
Telegram

Almaz Books

Naftaada ku qasab in aanay marnaba dhaafin muddada ay hawshaas dhammaystirkeeda u qabsatay, maalin kasta samee hawl fudud oo aad ogtahay in ay kugu dhoweynayso gaarista hawshii cuslayd ee kuu taalla ama ujeedkii aad u socotay.

2. MAALINTAADA HORE KA SII QORSHEE

Qodobkaan muhiim ma aha in aad loo sharaxo, keliya soo qaado warqad iyo qalin, oo bilow in aad qorto dhammaan hawlaha aad doonayso in aad qabato 24 ka saac ee kugu soo fool leh, adiga oo u dhigaya sida ay u kala muhiimsan yihiin, kaddib bilow hawsha qabashadeeda.

3. KU DHAQAN QAACIIDADA LA YIRAAHDO 80/20

Cilmibaarisaha lagu sameeyey isbarbardhigga waxsoosaarka shaqo ee bani'aadamka iyo sida uu waqtiga uga faa'iidaysto, ayaa xaqiijiyey in boqolkiiba siddeetan guulaha iyo waxqabadka shaqo ee aynu gaarnaa ay innaga qaataan boqolkiiba labaatan keliya oo waqtigeenna iyo dadaalkeenna ka mid ah. Taas oo haddii si kale aynu u dhigno noqon karta in waqtigeenna boqolkiiba 20 keliya aynu ka faa'iidaysanno, dadaalka shaqo iyo fikir ee aynu gelinno hawlaha inoo yaallaana aanu ka badnayn boqolkiiba 20 (20%) keliya oo ka mid ah inta aynu awoodi karno.

Marka ay sidaas tahay laba talo ayaa muhiim ah;

1, Waa mid ee, in aynu ku dadaalno sidii aan kor ugu qaadi lahayn ka faa'iidaysiga waqtiga iyo dadaalka aynu hawlaheenna gelinayno;

Almaz Books

2, Midka labaadna waa in, si ay boqolkiiba 20 (20%) ka keliya ee aynu waqtigeenna iyo dadaalkeenna ka isticmaalnaa aanu noqon mid aan isaguna waxtar badan yeelan. sida ugu habboon ee aynu taas uga hortegi karnaana waa in aynu nafta barno in aanay hawlo macna darro ah waqtiga ku lumin, iyo in mar kasta ay ku dadaasho in shaqooyinku sida ay u kala muhiimsan yihiin una kala culus yihiin aynu u galno si aynu waqtigaas boqolkiiba 20 (20%) ka ah uga faa'iidayno. Mar kasta oo aad hawl qabanayso niyadda ku haay xeerka ah 20/80, kuna dadaal haddii aanad kordhinayn dadaalkaas in aanu intan hoos uga dhicin.

4. KA FEEJIGNOOW CAQABADAHA

Mar kasta fikirkaagu ha ahaato mid waqtiga fog hiigsanaya, shaqada aad qabanaysana ha eegin miraheeda degdegga ah, sida mushaharka iwm. Laakiin eeg faa'iidada aad ka dheefayso waqtiga fog. In aad waqtiga fog iyo natiijada dambe ku xisaabtantaa waxa ay kaa indho-saabaysaa caqabadaha laga yaabo in ay ku horyaallaan oo haddii aad arki lahayd ay shaqadaada wax u dhimmi lahaayeen ama ugu yaraan dadaalkaaga niyadjebin lahaayeen.

5. WELIGAA HA ILLAAWIN KALA MUDNAYSIINTA HAWLAHAAGA

Waa in aad mar kasta qorto isla markaana niyadda ku hayso shaqooyinka kuu yaallaa sida ay u kala muhiimsan yihiin. Maxaa kuu diidaya in shaqooyinka kuu yaalla aad marka hore garato kuwa ay yihiin,

Almaz Books

marka xigana u kala horreysiiso nidaamka ah, 'B, T.J' oo ah sida ay u kala mudan yihiin u kala horreysii.

In aad shaqadaada sidaa u dhigtaa waa sida ugu habboon ee aad iskaga ilaalin karto in shaqooyinku iska kaa dhexgalaan, ama in aad shaqo aan muhiim ahayn waqtigaaga ku lumiso iyada oo shaqada kuu taallaa aad uga muhiimsan tahay ama uga culus tahay, waxa kale oo ay tani kaa ilaalinaysaa illowga iyo in aad hawlaha kuu yaalla qaarkood ka tagto.

6. NATIIJADA MUHIIMKA AH XOOGGA SAAR

Mar kasta waa in aad shaqadaada u eegto sida ay miraha ka soo baxayaa muhiimka u yihiin. Xoogga saar hawlaha aad ogtahay in ay raad fiican ku yeelanayaan xaaladda aad ku jirto, sumcad ahaan, maaliyad ahaan, xirfad ahaan, bulsho ahaan iwm. In aad horreysiisato shaqooyinka noocan ahi waxa ay sababaysaa in aad muhiimad siiso shaqada iyo in aad dadaalkaaga ku aaddan xoojiso sidii aad sida ugu habboon ugu dhammaystiri lahayd, adiga oo niyadda ku haya in aad gaarto natiijada aad ka gaarayso ee kuwa aynu soo xusnay ka mid yihiin.

7. RAAC XEERKA LAGU MAGACAABO 'WAQTI QASAB AH"

Waxaa jira xeer Dhahaya "Marnaba ma heli kartid waqti ku filan in aad hawlahaaga oo dhan qabato, laakiin waxa aad mar kasta heli kartaa waqti ku filan in aad qabato hadba hawsha ugu muhiimsan"

U fiirso, mararka qaarkood adiga oo u arka in aanad haynin waqti kugu filan, ayaa haddana marka aad ogaato in hawsha kuu taalla ee aanad

Almaz Books

dhammaystirin, waqtigana u la' dahay ay tahay mid muhiim ah oo qabasho la'aanteedu khatar ku tahay ama saamayn taban ku leedahay noloshaada, waxa aad arkaysaa adiga oo helay waqti aanad marka hore moodayn in aad hayso, oo shaqadii qabtay ka hor intii aanu waqtigeedu dhicin, haba noqoto in aad dhammayso daqiiqadda u dambaysa ee.

Mar haddaanu waqtigaagu kuu saamaxayn in aad hawlahaaga oo dhan dhammayso raac xeerkan oo hawlaha miro dhalka weyn ama saamaynta dhaqsaha ah kugu yeelanaya hore u qabo.

8. BILOWGA HORTII SI FIICAN U DIYAARGAROW

Ku dadaal in hawl kasta inta aanad bilaabin ka hor, aad si fiican u diyaargarowdo. Weligaa shaqo ha ku gelin si aan qorshe iyo diyaargarow lahayn. Diyaargarowga fiicani waxa uu dammaanad u yahay dhammaystirka ugu fiican ee shaqada iyo in laga gaaro natiijo wax ku tar ah.

9. SHAQADAADA BARO

Waajibka halkan waxaa looga jeedaa in aad barato wax kasta oo shaqadaada ku cusub, ama ku soo kordha hadba arrimaha iyo hawlaha aad jeceshay in aad ku xeeldheeraato. Ku dadaal in aad adigu wax isbarto. Hubka ugu fiican ee arrintan aad u adeegsan kartaa waa wax-akhris joogto ah iyo in aad raadraadiso wax kasta oo cusub, kana feejignaato in ay ku dhaafaan aqoonta iyo waayo-aragnimada hadba ku soo kordha shaqadaada.

Almaz Books

10. AQOONSI AWOODDAADA XIRFADEED

Mar kasta naftaada ka warayso, hawsha ay is leedahay si xirfad iyo kartiyi ku jirto ayaa ay u qaban kartaa. Is weydii, awoodahaaga gaarka ah. Ogow waxa aad dadka kale dheer tahay.

Su'aalaha noocan ahi waxa ay kor u qaadayaan kalsoonida aad naftaada ku qabto, waxa aanay ku barayaan waxa aad dadka kale dheer tahay ee aad tahay in aad ka faa'iidayso.

11. SUNTO CAQABADAHA KU HORYAALLA

Hawl kasta oo aad qabanayso, inta aanad bilaabin waa in aad xadiddo caqabadaha kaa hor iman kara. Baro taakooyinka horyaalla horumarka aad doonayso. Ha ku dagmin in aad caqabadaha qaar yaraysato, iyada oo naftaadu ku siinayso kalsooni ah in aad si sahal ah uga gudbi karto.

Waxaa muhiim ah in aad aqoonsato caqabadahaas. Kaddib bilowg in aad si xeeldheer uga fikirto sida aad uga takhalusi karto, midiba ta ay ka soo horreyso. Waa hab aad uga fiican habka ah in aad hawsha gasho adiga oo aan ogeyn caqabadaha kaa hor iman kara, kaddibna hadba ta kaa hor timaadda uun arka, ta xigtana suga. Taasi waxa ay keeni kartaa niyadjab iyo in hadba caqabad aanad sii ogeyn barashadeeda iyo fahamkeedu waqti kaa lumiyaan.

12. TALLAABO-TALLAABO

Ku dhaqan siyaasadda ah, tallaabo tallaabo in aad hawlahaaga u qaaddo. Weligaa ha ku degdegin in aad natiijada gaadho adiga oo aan

Almaz Books

hawshaba bislayn. Dooro bartilmaameed sugan, qor tallaabooyinka is xiga ee ay tahay in aad qaaddo si aad u gaadho bartilmaameedkaas, kaddib bilow tallaabo tallaabo in aad u gasho hawsha kaa xigta gaadhista natiijada aad hiigsanayso. Waxaa hubaal ah in haddii aad habkan raacdo aad arki doonto natiijo aad kaaga farxisa.

13. NAFTAADA CADAADIS SAAR

Waa in aad samaysato hab aad adigu isku waajibisay oo aad naftaada cadaadis ku saarayso. Waxaa ka mid ah in aad ku dadaasho in hawl kasta oo aad qabanayso aad u yeesho ballan kama dambays ah oo aad hawl ku dhammaystirayso iyo waqtiga aad doonayso in aanay kula dhaafin gaadhista hawshaas (Deadline). Samayso jadwal hawleed nidaamsan oo aad u marayso hawshaas. Naftaadana ku riix joogtaynta hawshaas iyo in aanad ka caajisin.

14. LABAN-LAAB AWOODDAADA SHAKHSIGA AH

Baro heerka tamartaada iyo awoodda kugu jirtaa inta ay le'eg tahay, sida awoodda aad u leedahay gudashada waajibaadka kuu yaalla. Baro awoodda aad u leedahay jimicsiga, wax-akhriska, iyo waqtiyada ugu fiican ee ay kugu jirto firfircoonida ugu fiican ee aad waajibaadkaaga ku qabsan karto. Kaddib bilow in aad ku dadaasho sida ugu habboon ee waqtiyada kalana aad ku kordhin karto awoodahaaga, iyo tamarta kugu jirta.

Hababka ugu habboon ee aad awoodahaaga shakhsiga ah ku kordhin karto waxaa ka mid ah, in aad cunto caafimaad qabta si caafimaadka ku

Almaz Books

habboon u cunto, jimicsi joogto ah in aad samayso, in aad hesho saacado hurdo oo kugu filan.

15. NAFTAADA DHIIRRIGELI

Joogtaynta kutub akhrisku, waxa ay maskaxda siisaa awood iyo habfikir tolmoon oo ay kaga gudbi karto dhibaatooyinka soo waajaha, waxa kale oo ay qofka gelisaa dhiirrigelin uu dulqaad ugu yeelan karo culayska ay leeyihiin gudashada hawlaha ka sokeeya gaadhista ujeedkiisa.

Dhegeysiga muxaadarooyinka ka warramaya horumarinta nafta, ka qaybgalka duruusta iyo tababarrada dhisidda shakhsiyadda iyo horumarinta nafta, iyo la macaamilka dadka raadka togan iyo aqoonta ku reebaya maskaxdaadu intuba waxa ay ka mid yihiin siyaabaha aad naftaada u dhiirrigelin karto.

16. KU TABABARO DIB U DHIGISTA WAXTARKA LEH

Waxa ay culimada cilminafsigu sheegeen in inta badan uu qofku ka baqo bilowga hawlaha ku cusub; culayska shaqada oo u uu arko in aanu qaadi karin, ama aqoon lahayn, iyo sababo la mid ah ayaa ku keeni kara in uu ku dhici waayo bilowga hore ee shaqada, muddana uu ka warwareego gudo galkeeda. Sida ugu habboon ee uu kaga bixi karaa waa in uu naftiisa u sheego in ay hawshaas qaban karo, kuna kalsoonaado kartidiisa. Laakiin waxaa jira dib u dhigis shaqo oo isagu waxtar leh.

Inta aanad shaqada bilaabin qor liiska hawlaha kuu yaalla, kaddib ka fikir sida ay u kala muhiimsan yihiin, kuna dadaal in aad dib dhigato shaqooyinka aad ogtahay in aanay ku dhaafayn ama ugu yaraan in

Almaz Books

khasaaraha ka imanayaa ka yar yahay khasaaraha ka imanaya dib u dhigista hawlaha kale ee kuu yaalla. Marka ay hawl muhiim ahi ku taallo dib u dhigo daawashada barnaamijyada iyo filimada aad xiisaynayso, sida oo kale dib u dhig ama iska jooji ballamaha haasaawaha asxaabta iyo nasashada ah ama aan lahayn faa'iido la mid ah faa'iidada ay leeyihiin hawlaha kale ee kuu yaallaa.

Intii awooddaada ah ku dadaal in aad iska caabbido qabashada iyo waqti ku luminta hawlaha aan lahayn muhiimadda ay leedahay shaqada kuu taallaa.

17. HAWLAHA ADAG KU HORREE

Maalin kasta marka aad toosto waxa aad dejisataa ama habeennimadii sii dejisataa liiska hawlaha kuu yaalla oo dhan, kaddib u kala hormee sida ay u kala culus yihiin. Shaqadaada ku bilow hawlaha culayska ama adayga lagu tirinayo. Qodobkani waa ka uu u taagan yahay magaca buugga aynu qormadan ka soo qaadannay ee ahaa, 'Cun rahaas' gaar ahaan ha ku dhegga ahaa 'cun rahaas weyn'.

18. ABLA-ABLEE HAWLAHA KUU YAALLA

Si ay kuugu fududaato in hawlaha u kala fuliso sida ay u kala muhiimsan yihiin, waxa aad u baahan tahay in aad hawsha lafteeda qaybo yaryar u qaybiso ama goballo ka dhigto, si fulinteedu u fududaato. Hawsha aad jajebisaa waxa ay kaa qarinaysaa baaxadda hawsha kuu taalla oo laga yaabo haddii aad mar wada eegto in ay niyad jab kugu riddo.

Almaz Books

19. WAQTIGAAGA QAYBO U KALA XIR

Siyaabaha ugu fiican ee waqtiga qiimihiisa aad ku dareemi karto, isla markaana ku garan karto horusocodka hawsha aad waddaa samaynayso iyo in aad waqtiga sidii saxda ahayd uga faa'iidaysanaysaa waa in aad waqtigaaga u kala xirto qaybo, aad mid kasta ku xisaabtanto waxsoosaarkiisa; sida toddobaad, bil ama sannad, adiga oo mid kasta hawl u gaar ah ku sargoynaya.

Tusaale ahaan hal toddobaad waxa aad gaar uga dhigtaa hawl ah in aad subaxdii oroddo, (Jimicsi), ama bil waxa aad waqti go'an u xidhaa in aad internet baadho si aad uga hesho xogta aad u baahan tahay, ama hal sano waxa aad nafta saartaa in ay ka jibbo keento barashada af (Luuqad) iyo wixii la mid ah. In aad waqtigaaga sidaas u kala xidhaa, waxa ay aad u dhiirrigelinaysaa in naftu ku xisaabtano waqtiga oo ay ku dadaasho in hawsha u taalla ay dhammayso inta aanu dhammaan waqtiga aad u goysay.

20. SAMAYSO DAREENKA XAALADAHA GAARKA AH

Waqtigaaga oo dhan ha ku buuxin gudashada waajibaadka shaqo ee kuu yaalla. In waqtigii aad shaqada u qoondaysay ay hawl kale oo daruuri ahi kaa soo dhexgashaa waxa ay sababi kartaa in xagaldaac ku yimaaddo habsami u socoshada qorshihii aad wadatay. Si aanay taas kuugu dhicin, waxa aad mar kasta qoondaysaa waqti firaaqo ah oo aad ugu talagasho gudashada waajibaadka degdegga ah ee soo baxa.

21. SHAQADA AAD GACANTA KU HAYSO XOOGGA SAAR

Almaz Books

Iska jir in aad maskaxda u dirto halwo is burinaya oo tiro badan. Marka aad shaqo bilowdo, ku dadaal in aad dib u dhigato hawlaha kale ee aanay ahayn waajib degdeg ah ama shaqo si caadi ah loogu dhex qaban karo shaqada aad gacanta ku hayso. Ku dadaal in aad barato kuna tababarato xirfadaha iyo cilmiga kaa caawinaya hal-abuurka iyo wanaajinta shaqada aad qabanayso.

Talooyinkaan waa ay ku anfacayaan. ee meel ku qoro.

Wax aad maanta qaban kartid barri oo aad mid kale qaban lahayd ha iskaga dayicin.

Howl saacaddeeda joogta sabti nabad ah looma riixo.

Almaz Books

Cutubka 5-aad

WELIGAA HA DEG DEGIN

" Dag dagsiimo door ma dhasho "

Almaz Books

Sheeko

Gabar yar oo labada gacan ku heysatay laba xabo oo Tufaax ah ayaa soo gashay qol ay fadhiyeen labadeedi waalid. Hooyadeed ayaa cod debecsan ku tiri, "Qaali, labadaada tufaax mid ka mid ah ma i siin kartaa?"

Gabadhi ayaa eegtay hooyadeed, ka dibna intay ilkaha ku qabatay hal tufaax dhinac ka goosatay hadana si dhaqso ah ayay kii labaad ilkaha ku goosatay.

Hooyadeed ayaa wejigeeda laga dareemayay in dhoola-cadeynti dib uga noqotay maadaama ay ka yara xumaatay. Aabaheed oo eegayay ayaa la soo booday, "Aabe waa ceeb sidaa, Hooyadaa haddii ay wax ku weydiiso waa la siiyaa"

Gabadhi yareyd oo labadi tufaax midba wax yar ka cantuugtay ayaa Hooyadeed intay ku soo dhowaatay ku tiri, "Hoo Hooyo, kan ayaa macaan labada!!!"

Qof kasta oo aad tahay, waaya aragnimo kasta oo aad leedahay, si kasta oo aad ugu heysato inaad Cilmi leedahay, marnaba ha ku degdegin ficil yar oo qof sameeyay inaad durbadiba faallo cilladeysan ka bixiso, qofna ha xukmin isla markina go'aan ha ka gaarin. Sug, Sabarka badi, Sii qof kasta fursad uu ku sharraxo naftiisa. Wixi aad aragto way ka duwanaan kartaa Xaqiiqada.

Marnaba wax ha ku dagdagin ilaa aad iska hubsato. waxaa laga yaabaa in sida aad u malaysid aanay ahayn.

Almaz Books

mar haddii aad qorshihii ku dhacdayna Shabaqa waad ku jirtaa. waxaad fursad haysataa inta aad banaanka ka joogtid oo aadan qorshaha soo galin.

Xawaare Xadeysan ku soco!

Badanaa goortii qofku dhalinyaro yahay, uu bilaabayo safarkiisi hanaqaadka wuxuu dareemaa inay tahay inuu sameeyo wax kasta hal mar.

Wuxuu go'aansadaa wax kasta inuu ka war keeno, ku waaya arko, halka ugu sareysa uu gaaro, sameeyo haasaawe badan, isku dul wado dad badan,

tartan dahsoon la galo asaagii, jeclaado inuu noqdo qofka ugu sareeya, ugu sita; hadana uu hilmaamo ujeedada dhabta ah ee nolosha, lumiyo energy & waqti badan.

Tartiibso—Ha ku deg-degin waxyaabaha qaarkood. U oggolow naftaada inay korto. Sug, su'aal, waqtina u hel aad ku miisaanto wax kasta inta aadan sameyn. Yeelo hadaf iyo han sare laakiin marnaba hamigaagu yuusan noqon sida kan xayawaanka oo kale oo ah inay ka fakiraan calooshooda iyo farjigooda keliya siday u baahi tiri lahaayeen!

Is weydii:

Maxaa Aduunkan laguu keenay? Maxaad u nooshahay?Maxaad rabtaa inaad sameyso ama noqoto inta aad nooshahay? Deji jadwal iyo qorshe nolosha ah, subax kastana talaabo aad ku gaareyso horay u qaad. Inaad u shaqeyso jihada muraadkaaga nolosha & qorshaha mustaqbalkaaga waa arrin mudan oo aad faa'iido u leh, balse inaad ku socoto xawaare

Almaz Books

sare wax kastana sameyso waa goosasho ticket kugu hogaaminaya halaag & inay kudhaafto noloshi dhabta ahayd.Waa inaad barataa dulqaad inaad yeelato. Waa inaad wax ka barataa waqtiga & waayaha, Kuwa hore ayaa dhalanteed iyo dheel-dheel ku dhumay oo dhexda ku dhacay. Waa in aadan naftaada saarin culays aysan qaadi karin. Ma xallin kartid dhibaatada aduunka oo dhan. Waa inaad dhexda u xirataa sidi aad imtixaanka nolosha u gudbi lahayd. Aamin Alle. Aamin naftaada, laakiin xusuusnow Tartiibso, Xawaare xadeysan ku soco. Marnaba, Weligaa cidla ha ku lumin energy-gaaga, u keydsowaxyaabaha ugu sareeya uguna muhiimsan nolosha inaad ku qabsato

WAAD GUULAYSAN KARTAA EE HA QUUSAN.

kuna dhaqan qodobadan si aad u hanato hiigsigaaga.

1 – Ku kalsoonow Naftaada

2- iska Ilaali furaha guul-darada oo ah inaad hawlaha dib u dhigato ama aad tidhaa hadhow ayaan qaban.

3- iska Ilaali marka aad go'aan qaadaneyso inaad dhiiranweydo.

4- Ha ku lumin wakhtigaaga adoo doonaaya inaad waxyaabo badan takhasus u yeelato,taasi waxay kaa dhigeysaa qof aan weli dhadhamin midhihii Guusha.

5- bixi sadaqada haba yaraatee,waxay farxad gelisaa qalbiga, waxaanay kaxeysaa murugada,waxaanay kordhisaa risqiga

6- ku dayo Nebi Maxamed(NNKHA),isaagaa ah hogaamiyihii guusha iyo farxadda

Almaz Books

7- booqo xarumaha caafimaadaka iyo jeelasha,, si aad u dareento nimcada caafimaadaka iyo xoriyada.

8- iska Ilaali inaad dhibaatada xajmigeeda ka weyneyso.

9- isku day inaad cudur daar ka raadiso qofka ku xumeeyay,iskana Ilaali aargoosiga.

10- iska Ilaali inaad cadawgaaga tusto cadhadaada,waayo waa inta ay doonayaan inay tashuush kugu furan.

11- markaad dadka la fadhido u fadhiiso qaab wanaagsan,ha ku hadlin waxaan kheyr ahayn,wejigaaga fur,ixtiraam dadka kula fadhiya,dhegeyso sheekadooda hana ka dhex gelin.

12- ha noqon sida duqsiga oo aan ku fadhiisan ama aan ku joogsan meel xun mooyaane meel kale,waxna ha u dhibin dadka nasabkooda,hana raadin ceebtoda.

13- iska Ilaali jacaylka aan xadka lahayn,waayo waa u cadaab qofka, waana xanuun ku dhaca qalbiga.

14- ha eegin waxyaabaha xaaraanta kaa ah.

15- nidaami xiliyada aad wax cunto,waxna ha cunin adoo dheregsan.

Ha ku dag dagine ka fikir. fiirso oo falaqeey.

Dag dagsiino door ma dhasho.

Geedkii orod lagu fuulo orod ayaa looga dagaa.

Almaz Books

WAQTIGIITAGEY XIKMAD BAA KU SUGAN, KA SOO SOCDANA YIDDIDDIILO!

Waxyaabaha ay ammintu gaar ka la tahay, waxaa ka mid ah: in aynna joogsan marna, in aan dib loo celin karin, iyo in uu degdeg u socdo. Waxaa oo dhan, waxaa ay ku shaqeeyaan sunne Ilaahiya oo abuuraha (Allah) xaggiisa jira. Sunnadanna waxa ay imanasaa marka uu Allah meel abuuro. Amminna waa loo helayaa. Ammini ma jirto meel/ goob la'aan. [Amminta iyo meesha] waxaa ka dhexeeya xiriir. Laakiin, bini-aadamka kaliya uun baa dareema amminta. Wuxuuna u dhexeeyaa amminta iyo goobta. Amminta waxaa la helay bini-aadamka ka hor. Sidaa si la mid ah gooobtana/meeshana, amminta horteed baa la helay. Laakiin, habsami u socodka bini-aadamka ee goobta, iyo waayaha waxaa ka dhasha qiimaha amminta (Waqtiga). Sabobta oo ah, dareemidda jiritaankooda [Amminta iyo goobta] waxaa ku dhammaystirmaya abuuridda jiritaankan cusub(Bini-aadamku wuxuu u dhexeeyaa beri iyo galbeed).

Su'aalo ilbaxnimo leh, iyo noocyada amminta!

Waxa aan akhriyey buug cajiiba, oo uu qorey nin fekeraaya oo reer Ciraaq ah, Dr. Cimaadu diin Khaliil, oo ka hadlaya (Tashkiilinta Caqliga Muslimka). Qoraagu [Buugga] dhexdiisa wuxuu si qaabeysan uga ga warramayaa sida loo tashkiiliyo caqliga Muslimka. Sida uu buuggiisa "Al-Fida" uga warramey qaabka uu Muslimku uga shaqeysiinayo ammintiisa (waqtigiisa). Si uu uga qeyb qaato dhisidda ilbaxnimada. Kownkan, Muslimka dhabta ahi, wuxuu u yimid ujeeddo aasaasa, [Allah addoon u noqosho]. Waana in ilbaxnimada la waafajiyaa manhajkaa Ilaahiga ah.

Almaz Books

Ninbaa aad u fiirfiiriyey aayado ka mid ah aayadaha kitaabka sharafta leh, ee [Allah], oo ay kusoo aroortey oraahyo tilmaamasa in qofka Muslimka ahi aannu la tacaalin amminta (waqtiga), isaga oo waafajinaya socodka luuqadiisa– ee uu la tacaalo waqtiga isaga oo la mideynaya hannaanka u dejisan. Sidaa daraadeed ayuu kitaabku uga warramay xawaaraha, degdega, iyo in loogu tartamo sidii erayada. Kuwaas oo dhami qofka muslimka ah awood ayey galinayaan, iyo nolol, [qof horumar u socdana way kasii dhigaayaan,] oo way hurinayaan! Sidaa suuna Islaamku ugu guuleysanayaa dhisidda qofka Muslimka ah. Qofka Muslimka ah dabeecaddiisa kama mid aha baraarug la'aantu. Ka mana mid aha in uu u dib u dhigo! Laakiin, wuxuu la baratamaa waqtiga in ta uu karo ee u suurtagesha. Taasina waa sababta uu markasta heersare u noqdo. Wuxuu si aan caadi aheyn u abuuraa fekerro, iyo saadaal Saynis. Si uu u keeno teknoolajiyad casriya. Taasina waa sababta uu kitaabka sharafta leh ay ugu jirto [birta] la yiraa (xadiidku).

Suuradda (Al-xadiid), waxaa ku jira hadal xeeldheer, oo aad ugu muhiim ah qofka doonaya in uu [la jaanqaado] ilbaxnimadan dhammayska tiran, ama wax cusub soo saarkiisa daneynaya. Ilbaxnimadu waxa ay u baahantahay aqoon. Sida aqoonta aan ilbaxnimada laheynba ayna u dhaqan galeyn. Waxaa jira dad aan kala saarin aqoonta iyo ilbaxnimada, laakiin, fiirfiirin dheer ka dib waxaa la ogaadey in ay jiraan farqiyo badan oo u dhexeeya (aqoonta iyo Ilbaxnimada).

Waxaa jira bulshooyin ilbaxa, laakiin, aan laheyn aqoon dhafsiisan gudaha. Sida ay u jiraan bulshooyin aqoon taariikhiya lehi, laakiin, waxa

Almaz Books

ay dib ugu noqdeen oo ay ku noolyihiin ilbaxnimo khatar ah. Sidaa suu u kala saaray (aqooonta iyo ilbaxnimada) fekeraaga weyn ee la yiraa "Bayxuuufaytish". Ilbaxnimada wuxuu ku sheegay " wixii ka dhasha caqliga cilmiga leh". Halka uu aqoonta ku sheegay " wixii ka feker leh ,ee diin iyo farshaxan ah".

Bulshooyinka baraarugsani waxa ay hannaanka humarka ka dhaliyaan adeegsiga birta (Xadiidka~ Iron). Birta xadiidku waxa laga sameeyaa aaladaha lagu dagaalamo (dagaal) – ee ay ku dagaalamaan quwaduhu. Qur'aan kuna wuxuu ku tilmaamay eray xeeldheer, [Allah wuxuu yiri] :(Waxa aan soo dajiney birta 'Xadiidka~ Iron", waxa ay leedahay balaayo daran, dadka faa'ido ayey u leedahay). Balse la heli mayo haddaan adduunka fekradihiisa lala adeegsan. Fekerkuna wuxuu ka dhalanayaa marka la is waafajiyo kitaabka iyo fekradda. Aayad kale ayuu [Allah] yidhi: (xaqiiqdii, waxaannu rasuuladayada ku soo dirney xujooyin cadcad, waxaanannu kusoo dejinay kitaab iyo misaan)

Suuraddan sharafta leh, wuxuu Allah innoogu tilmaamay hannaanka ugu wanaagsan ee aynnu umari laheyn ilbaxnimo. Ilbaxnimi ma jirto fekrad la'aan. Fekradna ma jiraso haddeyna heysan kitaab ay ka duusho. Sidaa daraadeed, Waxaynnu aragnay reer galbeedka oo ka shidaal qaatey fekraddihii Giriiga, fekradaha giriiguna waxa ay kasoo maaxdeen fekrado dhaqan oo ay ku sharraxeen riyadooda; waxa ay ka qabaan : Jiritaanka, bini-aadamka, iyo adduunka.

Ilbaxnimadii Islaamku waxa ay ka dhalatey markii ay is riixriixayeen fekradda iyo birtu, ula jeedo; Kitaabka layaab ka leh [Qur'aanka], iyo Birta xadiidku. Waxaynnu aragney ilbaxnimo lagu dhisay

Almaz Books

fahanka(Fiqiga), iyo tiirarkiisa. Tanna waa aqoonta fekradda Islaamka. Sida uu fahankuba mar kale innoogu matalo meel ay ummaddu qaanuun ahaan ugu noqoto. Waxaa sidoo kale imanaya, haddii ay muslimiintu fiirfiiriyaan kitaabka barashada erayada oo matalaysa dhaqanka Muslimiinta. Caqliga cilmiga leh ee weeleeya, wuxuu ku guuleysanayaa in uu curiyo ilbaxnimimadii Islaamka ee soo jireenka aheyd qarniyo badan – oo illaa kun gu' gaaraysay. Sabobtuna waa sida uu sheegay Dr. Cimaadudiin Khaliil, oo waxa ay u noqoneysaa arrimo dhawr ah, oo ay ka mid tahay in waqtiga loola tacaalo si heersare ah.

Wuu ka xoroobey qofka Muslimka ahi aafada dib-udhigashada, sida uu ugu guuleystay in uu soo saaro Muslim la tacaalaya waxyaabaha taban ee amminta. Wuxuuna ku boorriyey in uu amminta la tartamo, lana gadgaddoomo. Dadka kalana kula boratamo jaadadka kala duwan ee nolosha. Muslimka waxaa la amrey in uu socdo dhulka isaga oo aan istaageyn, [Allah] wuxuu yiri (Nabiyoow ku dheh; dhulka socda). Sidoo kale waxaa la amray in uu ogaado dhacdooyinkii ku dhacey duulalkii hore; Sidee bay u horumareen? Sidee bay se u dibdhaceen?!

Waa in uu Muslimku socdaa dhulka, si uu ugu cammiro shaqo manhajeysan oo ka timaadda fekerkiisa caafimaadka qaba. Waxaas oo dhan wuxuu u samaynayaa si waafaqsan manhajka cad ee Waxyiga. Waxyigu wuxuu qoondeynayaa yoolka jiridda bini-aadamka ee kownkan. Wuxuuna ku qoondeeyay saddex arrin: In Allah khaliif laga ahaado, in adduunka lagu camiro kheyr iyo guul, iyo in Allah addoomo loo noqdo si waafaqsan sharcigiisa. Ta koowaad waxa ay kusoo arortey suuratu Al-baqara, halka ta labaadna kaga soo aroortey Suuradda Huud, ta saddexaadna waxay ku soo aroortey suuratu Ad-daariyaat.

Almaz Books

Suurtagel maaha in la sameeyo shey, iyada oo aan amminta si fiican looga faa'ideysan. Ammintu waa weelka weyn ee laga soo saaro wixii la sameeyey. Ilbaxnimo iman mayso haddaan amminta si heersare ah looga umulin. Sidaa daraadeed aayadan ayaa ku soo arortey: (Kheyrka way u degdegi jireen) Aayadda labaadna (Kuwa tartamayaa haku tartamaan). Af ahaan, qaabka ay aayadda hore u adeegsatey ficilka mudaaric ee uu la socdo ficilka(Naaqiska ah) ee 'ahaadeen , waxaynnu ka dhandhansananaa in ay joogtey jireen. Halka ta labaad inna tusinaso amar (samee). Amarkuna culimada agtooda wuxuu sheegaa in ay lagama maarmaan tahay, hadduuna jirin wax ka dulqaadaa!

Labadan aayadood ee kitaabka sharafta leh ku jiraa; waxa aan ogaannay in la falgalidda ammintu ubaahantahay labo shay: In la joogteeyo, iyo inaan shaqada la joojin. Waa in si xeeldheer loo gartaa muhiimadda uu leeyahay waqtigu, iyo in ay tahay in ay aad uga miradhaliyaan. Taasina suurtagel maaha haddeynaan awooddeena dhaqaajin, dabadeed aynnu ku fekerno, dhaqanna gelino– oo aynnu iska dayno daalka iyo caajiskaba.

Qarni kala barkii Islaamku wuxuu helay, sidii uu ku baddeli lahaa kownkan. Wixii uu baddelayna waxaa ugu muhiimsana jaadadka taariikhda. Taasina waxa weeye sidii uu u nidaamiyey nolosha dadka, sidii uu ubaddelay fekerradooda iyo sidii uu dabar uga furey maankooda (Caqliyadooda). Waxa ay is heleen iyaga oo shaqeynaya uun, iyo, iyaga oo wax kasoo saaraya beeraha, hammigoodii wuxuu ka huleelay sayladihii kambalka (Safarkii jiilaalka iyo deyrta). Waxayna dhinac ka raaceen sayladihii fekerka,(waxa aan u nimid si aan

Almaz Books

addoomada uga saarno caabuddida addoomaha, oo ay u caabudaan Rabbiga addoomaha)

Taasi waxa ay kuu caddeynasaa socdaalka dheer ee taariikhda, iyo sida gunta weyn lafteeda. Taasina macnaheegu maaha waxa ay ka tageen sayladihii (suuqyadii) , waxa weeye; waxa ay dhalanrogeen hammigii suuqa ee dhuuniga ahaa, waxayn u baddeleen [dheefsiinta] caqliga . Taasina waa muhiimadda Islaamka weyn , laakiin, faciisu ma fahmayo maanta!

Suuradda Al-Casri : Innaga oo eeganna dhinaca horumarka.

Kitaabka muhiimka ah ee uu qorey aqoonyahan Abuu-qiddah (Qiimaha amminta culimada agteeda), waxa aad ku arki sida kuwa fekerka iyo cilmiga leh ee ilbaxa ahi uga faa'ideysteen amminta– ee aynna ilbidhiqsi noloshooda ka mid ah ugu lumin wax aynna faa'ido ugu jirin. Sideyna uga faa'ideysaneyn amminta iyaga oo akhriyey labada aayadood ee Qur'aanka, aadna u dhuuxey . Siduuna Musilmku u jeclaaneyn amminta (kuwa waxa maalaayacniga ah ka jeestey) , iyo (kuwa markey soo maraan maalayacni ku mara).

Waxaa jira buug kale oo ujeeddo muhiim ah leh, oo uu qorey Aqoonyahanka weyn ee Sheekh [Yuusuf]Al-Qardaawi [waxaana lagu magacaabaa] (Muhiimadda ammintu u leedahay nolosha Muslimka). Aad buu u kooban yahay. Balse waxaa ka buuxa cilmi iyo xikmad. Sheekhu wuxuu tiriyey astaamaha amminta, wuxuunna yidhi: Waqtigu wuxuu u socdaa degdeg, wixii kaa tagaa waligii kuu masoo noqonayo. Taasina waa xaqiiqo aan la is ka indhasaabi Karin, waxaa diida uun kuwa isla weyn!

Almaz Books

Wuxuu caddeeyey fekeraagii weynaa ee Prof: Maalik Ibnu Nabiyi in ilbaxnimadu ka dhalato waxqabad +qof+ ammin. Ilbaxnimo iman mayso haddaan saddexdaasi is caawin. Sidaa daraadeed, Suurtagel maaha in ilbaxnimo la helo haddaan dad helin, dadku (shey kasta waa u qareen, waynna u horreeyaan). Qofka bini-aadamka ah ee caddaaladda leh, waa ka ku guuleysta ilbaxnimada. Dadka noocaa ahina waa ka ku guuleystaa in uu si maangala uga faa'ideysto ammintiisa.

Isla afgaran waa kuma jiro in suuraddani(Al-Casri) tahay ta ugu dhumucda weyn kitaabka sharafta leh, Imaamu Shaafici dhinaciisa, wuxuuna yiri: '' Haddii uuna Allah, khalqigiisa usoo dajiyeen caddeyn kale, suuraddan mooyiye, iyadaaba ku filnaan laheyd.''

Suuraddan (Al-Casri) waxaa dhex ceegaaga afar arrin– oo dhammaantood ka warramaya sameynta ilbaxnimada. Laakiin, dadka intooda badan way akhriyaan iyaga oo meesha ka saaraya dhacdadeeda. Rogrogid badanna way ku sameeyeen mufasiriintu suuraddan:

1- Suuraddu waxa ay ku bilaabantay dhaarta amminta. Ammintuna waa ta uu noolaanayo qofku, inta uu muuqdo, iyo, inta uu ilbaxnimo sameynayo. Qofku ma jiro muuq ahaan inta uu dhalan ka hor, sidaa suu yiri [Xasan] Al- Bannaa, markii uu ka warramayey muhiimadda amminta. Wuxuuna yiri: ''Ammintu waa nolosha''– sidaasuuna ku tagey Imaam Ibnu Al-Qayim. Laakiin , Maalik Ibnu Nabiyi, wuxuu amminta ku tilmaamay bud-dhig, waxaynna ka mid tahay tiirarka ilbaxnimada. Bini-aadamku wuxuu leeyahay labo jiritaan; mid muuqda (Maadi) iyo mid ilbaxnimo. Ta koowaad waxa ay la gebogebootaa marka qofka

Almaz Books

noloshiisu gebagebowdo. Laakiin, ta labaad ma idlaato marka uu qofku dhinto– way sii jirisaa illaa geerida dabadeed. Dhaartaa Rabbi bilaash uma iman, balse waxa ay la timid si ay u caddeyso muhiimadda amminta.

2- Suuraddu waxa ay ka hadashay bini-aadamka. Waxayna u qaybisay labo jaad/qaybood: Qayb guuleydarraysatay iyo qayb kale oo guuleystay. Ta koowaad ee guuldarradu (May fahmin hannaankii nolosha iyaga oo waafajinaya waxyiga). Halka kuwa labaad ay garteen ujeeddadii nolosha, shaqaddiina ay wanaajiyeen si ay u gaadhaan yoolkaa. Dadku waa kuwa sameeya ilbaxnimada, waynannu aragnaa jaadadka dadka, waxaa jira mid fahmay ujeeddadii, laakiin, ujeedadda uma baddelaan fekrad. Fekraddana uma baddelaan qorshe, qorshahana uma baddelaan barnaamuj. Jaadkan waxaa lagu sifeeyay suuradda Al-Faatixa (Kuwa loo caroodey), waxa kale oo jira qeyb aan garan ujeedadii waligood, balse umalaynaya in ay shaqeynayaan, wanaajinayana shaqada! (Waxa ay malaynayaan in ay wanaajinayaan Suncada), waa jaad ka mid ah dadka, waxaana lagu sifeeyay suuratu Al-Faatixa;(kuwa hallaabay).

Suuraddu sidoo kale waxa ay ka warramasaa waddo saddexaad– oo ah dib u cosbooneysiinta bini-aadamka, in uu aragti leeyahay, iyo in uu qorshe leeyahay. [Qofku] guul ku ma gaadhayo aragti kaliya, hadduuna qorshe laheyn. Waxna ma qaban karayo qorshe kaliya haddii uuna aragti laheyn. Maxaa aragtida ka fiican marka ay ka imanaso qof diin leh!? Maxaase ka xun marka ay ka imanaso hawada qofka!?

Almaz Books

3) Waa shaqada wanaagsan oo ka dhalanasa aragtida fayow. Bini-aadan hadduuna jirin horumar ma jirayo. Bini-aadanka horumarsanna labo shaqo ayuu leeyahay: shaqada fekerka, iyo shaqada xubnaha– oo ka falliidhanta ta fekerka. Waxaa bata gefefka marka waxyaabihii muhiimadda waaxyaha nolosha u lahaa laga hor mariyo wax aan muhiimad laheyn.

Waxa laga yaabaa in aanad moodeyn in fekerku yahay shaqo, balse waa kuwa ugu muhiimsanba, ufiirso ilbaxnimada– waxaa laga soo guntaa maskaxda. Sidoo kale wuxuu caqliga u yahay raaxo!

4) Waa ka shaqeynta arrimaha guud, iyo difaacidda bini-aadannimada (In la isku dardaarmo xaqa, iyo in la isku dardaarro adkeysiga). Waa arrimaha bulshada, waa arrinta afraad, waanna kuwa ilbaxnimada ka ilaalinaya shaashawga. Ilbaxnimo jiri mayso iyo shaqo bini-aadan toonna, haddii aynna jirin fekerkan (Isku dardaaranka xaqa iyo isku dardaaranka adkeysiga). Erayga (Dardaaran) wuxuu sheegayaa shaqada in si loo dhanyahay loo qabanayo, waana wada shaqeyn.

Ammintii tagtey xikmad baa ku jirta, ilbaxnimaddiina waxa ay sameysay dugsi xikmada. Amminta soo socotana waa hiddiddiilo, ilbaxnimaduna waa suurtagel in mar labaad la sameeyo. Ammintii tagtey waxa ay inna barasaa in werwerka tagtadii uu yahay shay, hiddiddiiladuna tahay shay kale. Qofka hiddiddiilada lihi wuxuu leeyahay feker nool. Qofka tagtadii ka werwersanna hiddiddiiladiisii way dhimatay!

Ammintii tagtey muslimiintu waxa ay galeen taariikhda si mug leh, sabobta oo ah waxa ay garteen sirtii nolosha. Waqtiga soo socdana way

Almaz Books

geli doonaan taariikhda, sabobta oo ah ammintaa inna barey in aynna noloshu uhagaagsaneyn doqommada.

Waqtiga shaqaa la qabtaa, shaqadana waa laga fekeraa, fekerkana dadaal baa la geliyaa. Suurtagel maaha in dadku jiraan shaqo la'aan, suurtagelna maaha in feker la keeno haddaan laga shaqeysiin maskaxda. Sidoo kale, suurtagel maaha in fekradi timaado haddaan dadaal la galin,

dadaalkuna waa in caqliga laga shaqeysiiyo iyada oo laga soo dhiraardhirinayo fekrad meelmara.

Aminta /(Waqtiga) Haddii aad ilaaliso ogow hormarkaaga ayaad barbaarisay.

Ka faaiideyso waqtigaaga inta aanu isaga kaa faaiideysan.

Almaz Books

Cutubka 6-aad

7-da Xeer ee Dahabiga ah ee Noloshaada Kuu "Sahlaya"

Almaz Books

Waxaan ku noolnahay nolol ay mushkilado badani ku hareeraysan yihiin, ha noqoto dhinacyada shaqda, waxbarashada iyo mid shakhsi ahaaneed intaba, waxaa inasoo waajihi kara arrimo badan oo adag isla markaana soo noqnoqda, mararka qaar waxaan filaynaa inaan ku noolaanno nolol dabiici ah oo iska sahlan oo wax culeys ah iyo kallifaad toona aan lahayn.

Hadaba, si nolosheennu ay u noqoto mid fudud oo sahlan uma baahana inaan marno waddo dheer, waxaa la inaga doonayaa oo qura inaan raacno xeerar dhowr ah oo la inaga doonayo inaan ku dhaqanno.

Maqaalkan kooban, maanta waxaan uga hadleynaa 7 xeer oo si aasaasi ah noogu damaanad qaadaya inaan helno nolol fudud oo ka maran kalifaad iyo culeys.

1. Xuduud u yeel naftaada

Naftaada u yeel xayndaab aaney dhaafi karin, kala xadee arrimaha muhiimka ah iyo kuwa aan muhiimadda gaarka ah lahayn, xadee saacadaha ay howlqabad gaar ah sameynayso waqti nasasho ah sameyso isku day inaad sameyso waqti ugu badan ee aad shaqo qaban karto.

2. Sirtu Waa Maalinta Bilowgeeda...

Dad badani marka ay hurdada ka soo kacaan isla markiiba waxey eegaan e-mail-kooda iyo iney farriin goonni ah u soo dhacday iyo in kale, dhaqankaasi ma fiicna, bilowga maalinta ka fogow taleefoonkaaga gaarka ah, si dagan u soo kac, quraacdaada qaado, maalintaada markaa kadib bilow.

Almaz Books

3. Habeynta guriga iyo xafiiska

Si noloshu u sahlanaato waxaa lagaa rabaa in waxwalba oo aad habeynayso, hagaajinta koowaad waa inaadan aadan wax isku adkeyn, markaa waxaa lagama maarmaan ah inaan ka hadlno habeynta guriga iyo xafiiska.

Marie KONDO, oo mowduucan buug ka qortay la yiraahdo "La Magie Du Rangement" kaas soo baxay sanadkii 2016, waxey ku sheegtay in wadada ugu wanaagsan ee wax lagu habeeyaa ay tahay in noocooda loo kala hormarinyo oo intii isku nooc ahba meel loo gaar yeelo, waxyaabaha muhiimka ah meel sare oo la arki karo la dhigo, kadib lagu xijiyo kolba siday usii kala hooseeyaan.

4. Naftaada Sii Waqti Gaar ah

Dhinac kasta waxaa inooga hareeraysay dad iyo asxaab inoo gaar ah, ha noqoto shaqada ama guriga, waddooyinka iyo goobaha kale, waxyaabo badan ayaan maqalnaa oo aan aragnaa, si arrimahaas oo dhan xilliyada gaar aad uga dhex baxdo waxaad u baahan tahay in maalintii ugu yaraan rubux saac ama 15 daqiiqo aad naftaada ku kali noqoto, fariiso adigoon fakareyn wax dhaqaaq ah aan sameynayn. haddii aad sidaa sameyso maalinta inta ka harsan si daganaan ah ayaad ku qaadaneysaa.

5. Baro inaad wax diidi karto iyo erayga "Maya"!

Eraygii ugu horreeyay dhulka dushiisa laga isticmaalo waxa uu ahaa (Haa) ama (Maya)..Pythagoras.

Almaz Books

cadaadiska ugu badan ee dadku ay waajahaan nolol maalmeedkooda waxa uu uga yimaadda erayga "Haa", sababtuna waa meel looga baahnaa erayga (Maya) ayuu haa yiri qofku howl aanuu qaban karin ama uu dhibsanayo ayuu dusha saartay. Inaad wax diiddaa waa arrin iska dabiic ah, waxaase muhiim ah inaad waddo wanaagsan wax ku diiddo.

6. Ka Fogow Inaad Shaqooyin Badan Isku Dul Furto

Dad badani waxey moodaan in arrimo badan oo la isku kor furo wax-soo-saar fiican uu ka dhalanayo, waxaad ogaataa markaad sidaa sameyso inaad naftaada cadaadiska ku kordhineyso, natiijada ka dhalaneysaa waa in waqti badani uu kaa lumo dadaal badanina uu kaa baxo!.

7. Inta aadan falin Ka Fiirso

Isweyddii xilli kasta: "Maxey tahay sababta igu khasbaysa inaan sidan iyo sidan sameeyo? Yaad howsha u qabaneysaa? inaad sameyso ma dooneysaa? Ma qaban kartaa?..."

Su'aalo badan isweydii intaadan howlqabad sameyn, shay aadan la dhacsaneyn ama aadan qaban karin naftaada ha ku khasbin, noloshaada fududee oo ha isku adkayn.

Haddii 7-da xeer aad ilaaliso, waxaad u diyaarasan tahay inaad ku noolaato nolol sahlan oo aan kallifaad lahayn.

Almaz Books

HORUMARINTA NAFTA IYO HIIGSIGA MUSTAQBALKA

MAXAA KUU DIIDAN INAAD HAMIGAAGA GAARTID?```

Ma xasuusataa inaad Dhallaannimadaadii mar uun aad ku fikirtay inaad noqotid Madaxwayne, Doctor, Imaam Engneer, Ganacsade... IWM?

Halkeebuu hamigaagaasi ku dambeeyay?

Haddii aad waynaatay micnaheedu maaha inaad iska tuurto hadafkaagii markaad yarayd ee qadiimiga ahaa.

Dadku hadaf iyo hiigsi way wada yeelan karaan.. laakiin kama wada dhabayn karaan!

Sababaha ugu badan ee kaa hor istaagaya himiladaasina waxa ka mid ah:

1- Hadaf iyo Qorshe la'aan:

Kaliya waxa iska nooli waa xayawaanka ee aanay waxba sugaynin, haddii uu qofku bilaa qorshe ku noolyahayna xayawaankaa waxba ma dhaamo,Meelna kuma gaadhi kartid adoon khidad iyo balayn cad u samayn.

2- Waqti lumin-

Waxa ugu wayn ee aad dunidan ku haysataa waa waqti iyo caafimaad.. waqtigu xawli kuma socdo sida kaa dhaadhacsan ee adigaan qabanayn wixii loo baahnaa... daqiiqaddii ku dhaaftaa ha ka sugin inay soo noqoto.. ka fikir waqtigaad haysataa inuu ka yar yahay intaad filaysid!

Almaz Books

3- balwad :

Markaad aragtid qofku isagoo canka Qaad ku haya.. Sigaarna aad u budhbudhinaya.. gees ka qosol iyo kaftan badanna wada., ha u qaadan in uu xaaladdaa markasta ku jiro... Lama joogtid marka uu qufac iyo xiiq la daalaa dhacayo.. marka ay qabsin iyo xanuuno kale kusoo kordhayaan.. uguna horreeyaan dilaaga aamusan ee kansarka..

Balwaddu kuuma hambayso wakhti iyo caafimaad toona..

Ka soomaali ahaanna balwadda iyo qabyaaladdu waa waxa dunida innaga reebay.

4-CAAJIS :

Allaah (SW) shimbirkaba wuu arsaaqaa.. laakiin cufkiisa uguma dhexrido quudka...

Adiguna sidoo kale xaglo laaban xoolo ku heli maysid.

Weligaa haka caajisin ka dhabaynta hamigaaga.. hana adeegsan kalmadda bilaa-camal oo imika dadka qaar u noqotay kiniin ay waqtiga ku lumiyaan.

5-mar wada qaboda

Inkastoo aad laba shimbirood dhagax kaliya kuwada dhufan kartid.. haddana ninka laba shimbirood wada eryadaa wuu wada waayaa..

Waxa aan ka wadaa in aanad isku dayin qabashada laba hawlood ama shaqo mar qudha.. waxa ay u badantahay in aad midna qaban waydo..

Almaz Books

6-cudur-daarka badan iyo dib u dhigista badan

Dhab ahaantii lama soo koobi karo waxyaabaha qof kasta ka hor istaagi kara in uu hamigiisa iyo himiladiisa gaadho..

Laakiin su'aasha ugu wayn ee ay tahay in uu qofku markasta is waydiiyaa waa:

Hawsha aad imika haysaa makugu dhawaynaysaa heerka aad doonaysid inaad berri gaadhid.. mise way kaa durkinaysaa?

Wakhtigaaga maxaad ku qaadataa..?

Ma ka faaiidaysataa oo ma ku qaadataa wixii berri ku anfici lahaa..?

Guusha

Dadka oo dhami waxa ay niyada Ku wada hayaan oo qof waliba ka fakarayo waa inuu mar un libinta hanto(guuleysto).

Haddaba guusha aad doonayso ma mid aad iskaga riyooto baa oo qiyaali ah mise waa mid aad dedaalkeedi hayso baa labadaa waa mid un balse hadii aad dedaalkeedi hayso waa hubaal in aad gaari balse hadii aad riyo un iskaga jirto oo aad is ledahay waad guuleysan hadaba is ilaali oo ha ka dhicin salaanka nolosha.....

dadka guulaysta waa dad mar ka hore Ku sifooba sifooyinka wan-wanaagsan sida alle ka cabsiga oo inagu waajiba sido kale dadka guuleysta waa dad mar walba wax akhriya weliba si aad ah sababtoo ah akhrisku waa salanka guusha.....

Almaz Books

Haddaba adigu wll noqo qof mar walba wax akhriya waa hubaal in aad guuleysan donto kuna sifow sifoyinka aan kor Ku soo xusay..

waxa hubaal ah in uu alle Ku weydiin dono maalinka qiyaame sababtaa aad uguuleysan weyday adigoo alle caqli Ku siiyey oo Bini aadam kaa dhigay..

weligaaga ha aqbalin in aad safka dambe ee nolosha Ku jirto balse mar walba safka hore Ku jir oo noqo qof qiimihisu sareeyo laguna riyodo in badan....

Guusha ubaadigoob oo u doon sida neefta aad qaadanayso oo kale waa hubaal in aad gaari.

Almaz Books

Sidee Loo Yeeshaa Shakhsiyad Wanaagsan?

Tallaabooyin Fud-Fudud Balse Waxtar Badan.

1- TALLAABADA KOOWAAD:

MASUULIYAD ISA-SAAR: ``Masuuliyaddu waxa ay raadsataa qofka ay ogtahay in uu qaadi karo`` -Elbert Hubbard.

Marka dadku qaabilaan masuuliyad dheeraad ah, runtii naftooda ayaa ay dalacsiin usamaynayaan.

Masuulnimadu waa xil-qaadis. Waxa ayna muujisaa qaan-gaarnimo. Aqbalaadda masuuliyaddu waxa aymuujisaa qaabfikirkeenna.

Dadka intooda badani waa ku dhakhso badan yahiin sheegashada amaanta wanaagga qabsooma, laakiin waa yaryahiin inta sheegata masuuliyadda khaladka dhaca. Qofku haddii uu aqbali waayo masuuliyadda saaran, masuuliyadaasi sidaas kagama ay harayso.

Muhiimaddu waa in aad leedahay masuuliyad.

ISKA-JOOJI EEDAYNTA.

Ka fogoow odhaahyada ah:

- Qof walba ayaa sidaas sameeya.
- Cidina masamayso.
- Adiga ayaa khaladka wada leh.

Almaz Books

Dadka aan masuuliyadda qaadin waxa ay eedda saaraan waalidkood, macalimiintooda, awoowayaashod, qadarta, nasiibka ama xidigo. Waa in qofkasta ilmo-nimada lagu celceliyaa barashada masuuliyadda. Lama baran karo haddii aan mudeecnimo qofku la imaanin.

Wiil yar oo layiraahdo Johnny ayaa hooyadiis ku yiri ``Hooyo! Jimmy ayaa daaqaddii jabiyey`` Hooyadiis ayaa waydiisey ``Sidee u jabiyey?`` Johnny ayaa markaas yiri ``Dhagax ayaa aan ku tuuray, kadibna waa uu ka gabaday``

Dadka xasaanaddooda adeegsada si loo rumaysto oo kataga masuuliyadda saaran waxa ay ku dhammaadaan in ay xasaanadaas waayaan. Masuuliyaddu waxa ay ku fadhidaa ficil ka fakarid iyo ka fiirsasho xambaarsan. Masuuliyadda shacabka kaa saaran.

Xikmad Hindiyeed qadiimi ah ayaa ina baraysa in masuuliyadda koowaad ee qofka ay ka saarantahay bulshadiisa, tan labaadna qoyskiisa tan saddexaadna nafsaddiisa. Markii kala horayntaas la isdabomariyo bulshada waxaa ku yimaadi dib-unoqosho.

Xil iska saaridda ummaddu waa in ay noqotaa waxa caqli kastaayi uu waajibka koowaad u arko.

Masuuliyadda iyo xoriyaddu waa labo gacmahais haysta oo markasta isla socda. Calaamadda lagu garto wadaniga dhabta ahna waa in uu markasta diyaar u yahay in uu culayska ummadda qaybtiisa ka qaato. Qiimaha lagu iibsado shakhsiyada qaaliga ahi waa masuuliyadda. – - Winston Churchill.

Almaz Books

Ficilada dadka khaa`imiinta ahi ma aha waxa bulshooyinka burburiya ee waa ficil la`aanta dadka –wan-wanaagsan. Dad isdaba-marsan dheh. Haddii ay dad wanaagsan yahiin miyaa ay ficil la`aan ahaan lahaayeen? Mise waa khayaanoolayaalloo yaqaan dad wan-wanaagsan ayaguna? Haddii dadka wanaagsani u dulqaadanayaan in lagu burburiyo ficil la`aantooda, sidee dad wanaagsan u yahiin?

Si sharka iyo sharlowgu u naaxaan, waa in dadka wanaagsani aysan waxba qaban, markaas sharlowguiyo sharkuba waa ay naaxayaan.

2- TALLAABADA 2AAD:

TIXGALIN MUUJI:

Wiil toban jir ah ayaa soo galay dukaan jallaatada lagu iibiyo, kursi ayuu fariistay waxa uuna adeegtadii dukaanka waydiiyey ``Intee weeye qaymaha hal xabo oo jalaato ah?`` waxa ay ugu jawaabtay``Todobaatan iyo shan santi``. Wiilkii waxa uu tiriyey lacagtii uu haystay oo biro(Coins) ahayd kadibna waxa uu waydiiyey mar labaad ``Intee weeye qaymaha xabadda jallaatada ah ee yar?`` Adeegtadii ayaa si dulqaad-yari kamuuqato u tiri ``Lixdan iyo shan santi``. Wiilkii ayaa markaas yiri ``Waa yahay tan yar ayaa aan doonayaa``.

Inankii jallaatadiisii ayaa uu iska cunay, lacagtii ayaa uu u reebay kadibna waa uu iska tagay.

Markii adeegtadii kusoo noqotay meeshii inanku fadhiyey si ay weelka uga qaaddo iyo lacagii waxa ay lakulantay arin ay la jiriiricootay. Kor waxaa saarnaa lixdan iyo shantii santi ee jallaatadu ahayd, weelka hoostiisana waxaa ku jiray toban santi oo uu wiilku dheeraad ahaan

AlmaZ Books
Telegram
Almaz Books

adeegtada ugu reebay maadaama ay u adeegaysay. Ilmaha yari waxa uu ku dhaqmayay tixgalin uu u samaynayey adeegtadaan kahor inta uusan jallaatada ka dalban. Nafta dadka kale ayaa uu tiisa ka hormarinayay. Haddii aan dhammaanteen u wada fakari lahayn sida inanka yar, dhammaanteen waxa aan kuwada noolaan lahayn duni aad u wanaagsan. Tixgalin, soodhawayn, iyo akhlaaq muuji.

In aad Ka fakartid dadka kale waa hab-fikir daryeelid ku salaysan.

XEERKA 15 DAQIIQO

1. Haddii Aad Maalin Kasta 15 Daqiiqo U Qorsheyso Horumarinta Naftaada Waxaad Dareemi Doontaa Isbeddel Weyn Dhamaadka Sannadka.

2. Haddii Aad Maalin Kasta 15 Daqiiqo Ka Jarto Waqtiga Kaaga Luma Micna La`aanta Waxaad Gaari Doontaa Guul La Taaban Karo Sannadaha Xiga.

3. Haddii Aad Maalin Kasta 15 Daqiiqo Barato Luqad Cusub Waxa Ay Ka Wanaagsan Tahay In Aad Fasal U Aaddo Usbuucii Hal Mar.

4. Haddii Aad Maalin Kasta 15 Daqiiqo U Qorsheyso Socod Boobsiis Ah Waxa Ay Ka Qiima Badan Tahay Adiga Oo Jiim Aada 2 Maalin Usbuucii.

5. Haddii Aad Maalin Kasta 15 Daqiiqo Akhriso Buug Ama Qoraal Waxa Ay Qeyb Weyn Ka Qaadan Doontaa Awoodda Fahamka Iyo Garashada.

6. Haddii Aad Maalin Kasta 15 Daqiiqo U Qoondeyso Wax-qorid Waxa Aad Awoodi Doontaa In Aad Qorto Maqaal Dhameystiran 2 Ama 3

Almaz Books

Maalin Kasta, Kadibna Waxa Ay Noqon Karaan Buug Dhan Oo Adigu Qortay.

XEERKAN WAXA UU KU FIICANYAHAY:

- In Uu Yahay Mid Gaaban.
- In Aadan Heysan Marmarsiyo Ah Waqti Ma Heli Karo.

7 Tallaabood oo Aad Ku Daahrogi Karto Hibadaada Qarsoon.

Hibadu waa awood cajiib ah oo Alle uu qofka ku manneysto, in qofku uu hibadiisa ogaado oo uu horumariyo waa tallaabada koowaad ee wadada guusha iyo horumarka.

Dadka qaar waxaa u suurogashay iney hibadooda daahrogaan xilli hore, halka kuwa kalena ay ku adkaato iney ogaadaan waxyaabaha ay hibada ku leeyihiin oo ay dadka kale kaga xariifsan yihiin.

Hadaba, waxaan idiin soo gudbineynaa 7 tallaabood oo haddii aad qaaddo aad ku daahrogi karto kuna kobcin karto hibaadada gaarka ah, ogow in qof kastaa uu leeyahay hibo uu dadka kale kaga xariifsan yahay.

1-Baadigoobka Hibada

Naftaada weyddii waxey jeceshay, oo ay si dabiici ah u qabato una sameeyo iyadoon wax fakar ah u baahan, haddii aad jeceshahay inaad sawir waqtigaaga ku qaadato; inaad waqtigaaga dayacdo maaha oo aad waxyaabo kale isku mashquuliso, hibaadada horumari oo xoogga saar.

Almaz Books

2-Raadi halka aad ka xooggan tahay

Dhibicda roobka ah haddii ay ku duldhacdo badweynta qofna ma arki karo weyna baaba'daa balse haddii ay ku duldhacdo Caleen qoyan waala arkaa wayna ka dulmuuqataa.

Adduunkaan weyn ha ku dhex dhumine ka raadso meesha aad uga haboontahay.

Naftaada weyddii maadada ama shayga aadan welwel ku dareemayn ee aad ku raaxaysaneyso marka aad qabaneyso, shaygaasi waxa uu fure u noqon karaa daahrogga hibaadada qarsoon.

2- **Geesi noqo**

Dadadka oo dhami waa fulay balse qaar ka mid ah ayaa yaqaan marka ay geesinimadu lagama maarmaan tahay.

Baro waxa lagama maarnaanka ah si aad hiwaadadaada u horumariso, waxaa kugu adkaandoona inaad gabyaa sheegato adigoon garaneyn sida qaafiyadda gabayga iyo miisaankiisa loo xakameeyo.

3- **Hadaf nololeed yeelo oo duruufuhu yaaney ku bedbedalin**

Isbuuc kasta arrin cusub tijaabi, markaad isku dayga badiso waxaa dhici kara iney kuu soo baxdo hibaadaada aad ku wanaagsan tahay dad badanna aad kaga fiican tahay.

Almaz Books

4-Shayga aad xiisayso ha ka caajisin

waxkasta kuma fiicnid balse hal wax ayaad dadka oodhan uga fiican tahay ee raadi waxaasi. ma jiro qof ka wanaagsan qof shaqada uu xiiseeyo si joogta ah u qabta.

Waxyaabaha aad u xiisooto ha joojin, naftaadana weyddii; maxay tahay waxyaabaha ay doonayso inaad si joogto ah u sameeyo, kuma jiraan waxyaabaha dadka kale ay xiiseeyaan oo adiguna aad iskala qabsatay.

5- Diiwaangeli guulaha aad gaarto

Maalinkasta guulbaad gaartaa balse naftaada oo guusha iyadu gaartay uma sheegtid guushaada.

Isku dayada aad sameynayso oo aad hibadaada ku daahrogeyso diiwaangeli oo meel adiga kuu gaar ah ku xafido, naftaada dhiirigelin u samee waxwalba oo wanaagsan oo ay sameyso ku abaalmari.

6- Waxaa lagaa doonayaa Samir iyo dulqaad

waxaan lagu dhibtoon laguma dheefsado.

" Dheefeey xagee joogtaa ?? "

" dhib gadaashiis ayaan joogaa "

AlmaZ Books
Telegram

Almaz Books

Hibadu waa inaad xirfad ku wanaagsan tahay waddo aa dadka kale u sahlanayn, sidaa darteed hibadaasi waxey rabtaa in si gaar ah loogu dadaalo, arrintaasina waxey u baahan tahay samir, dulqaad iyo quus la'aan.

4 caado ha samayn hormar kaga dartiis

Cumrigu aad ayuu u socdaa qofna ma sugayo waxaan aragnaa in maalmahu ay nagu dhaafayaan sida hillaac hilaacay. sidaa darteed waxaa lagaaga baahan yahay inaad gabi ahaanba joogisid caadooyinkaan aan kuu sheegi doono maslaxaddaada darteed. shalay waxaad ahayd wiilyar ama gabar yar oo aana wax shaqo ah laga rabin kaliya ay shaqadiisu tahay inuu ciyaaro. Xoogaayar ka dib waxaad aragtay adoo dugsi ama iskuul lagu geeyay lagaana rabo waajibaad ah inaad maadooyinka ka shagayso. waxaad haysataa fursado badan oo aad naftaada wax uga badali kartid oo aad ku biiri kartid liiska dadka guusha gaaray.

Hadaba waxaan u guda galayaa Caadooyinka lagaa rabo inaad ka istaagto inta aad yartahay.

1. **Wax u jeed ah malihid.**

In ay jiraan ujeedooyin muhiim ah oo aad noloshaada xaqiijinayso waa arrin lagama maarmaan u ah hormarinta naftaada. Haddii aad hadaf la'aan nooshahay waqtigu si fudud ayuu kugu dhaafi doonaa adiga oo aana dareemayn. Waxaad indhaha soo kala qaadi doontaa adiga oo dhabarka xanuunkugu billowday. muruqyadii xoogga tabar dhigeen. waana digniin adag oo kuu sheegaysa inaad tabar yaraysay. Waxaa

Almaz Books

qasab ah inaad leedahay wax aad hiigsanayso waana Farqiga u dhexeeya guusha iyo fashilka. Haddii aad ujeedo la'aan nooshahay mar allaale markaad qoraalkaan aqrisid qalin iyo waraaqad qaado oo isweydii Maxaan nolosha uga baahanahay kadibna qor wixii kuusoo baxa oo daji wax aad hiigsanaysid noloshaada oo aad u dadaalayso inaad xaqiijisid inta aad nooshahay. kadibna markasta fiiri oo isweydii maxaan hormar sameeyay sanadkii la soo dhaafay.

Sanadkii 1979kii baarayaal ka tirsan jaamacadda Harvard University Ayaa qaar ka mid ah ardayda waydiiyay inay hadafyo leeyihiin Ujeedooyin cad oo ay inay xaqiijiyaan. hadaba 84% waxay sheegeen inayna waxba ujeed ah lahayn halka 13% Ay sheegeen inay leeyihiin ujeedooyin balse aanay qornayn Halka 3% ay sheegeen in ay leeyihiin ujeedooyin qoran. 10 sano ka dib waxaa la ogaaday inay nolosheedu ahayd mid dhinac kasta ka dhisan, markii loo fiiriyo kuwii kale.

Ujeesooyinka Tusaale ahaan karaamada bani'aadamka u qalmo mudo gudaheed, Inaad ku dhisato guri qurux badan, Inaad qorto buug ay dadku aqristaan Buugaan hadda aad aqirnayso waxaan ku haminayay mudo dheer, Maanta waxaad fursad u haysataa inaad aqrisid adigu. Inaad barato maaddo aad jeceshahay.

Marba haddii aad go'aansatid inaad wax sameyso ilaahey duruufaha ayuu kuu sakhiri, Dabaylaha ayaana laguu dhaqaajinayaa si uu hadafkaagu u dhamaystirmo.

hadaba Hadafsamayso oo higso.

Almaz Books

2, Shabakada bulshada

Shabakada bulshada waa Aafada sanadkaan waana God madow oo waqtigaaga muudsanaya kuna dhaxalsiinaya shalayto iyo burburnololeed aadan waligaa ka kabsan doonin FACEBOOK iyo Socialmedia Waxay ku galinayaan xalaqad fashil iyo murugo aana dhammaad lahayn waa sida aan badankeen u isticmaalno ee iska dulfadhiga ah. Heer waxaad gaaraysaa aad karaamadada adigu ilkahaaga ku rifto. oo aad adigu isku wareegato, " Maanta halkaas ayaan dalxiis u aaday, Halkaas ayaan waxaas ka sameeyay, halkaas ayaan waxkasoo cunay. halkaas ayay ka dhidan tahay " iyo hadalo la mid ah oo dhamaantoodba aana faa'iido lahayn. Maalinkasta sidaas ayaad sameynaysaa waa xalaqo aana dhamaad lahayn adiga ayaana iskuwareeganaya sidii jiirdabin ku dhacay.Waqtigu waa adiga waxa aad ka faaiideysato ayaadna ka faa'iidi doontaa. haddii aad dulfadhisid Social media oo aad facebook kor iyo hoos u gadinaysid Waqtigaaga halkaas ayuu ku lumi doonaa waxaadna guran doontaa miraha faqiirtinimada iyo xanuunka fashilka. balse maanta ma dareemayside waxaad dareemaysaa mar aadan waxba ka qaban karin laaxadaada.

Hadaba ha u ogolaan Socialmedia inuu waqtigaaga lumiyo ee la soo Bax xikmadda Alle kusiiyay adduunkaan weyna dhinac ka raac oo Adduunkaaga iyo Aakhiradaada u shaqayso ha fadhiyin meele.

Ogow waxbadan ayaa ku fiicantahay balse ma ogid qofna kuu sheegi maayo in aad adigu heshid maahee. sababtoo ah qofna ma yaqaano xitaa adiga.

Almaz Books

3. Daawasha muuqaalada xun xun.

Fiirsashada aflaanta xun xun oo ah burbur qoto dheer oo Naftaada ku dhufta kuna dhaxalsiiya shalayso iyo fashil aan kasoo noqod lahayn. Sanad kasta Kumanaan digniinood oo qaylo dhaan wata ayaa lagasoo saaraa. Daraasad dheer oo jarmalka lagusameeyay ayaa lagu ogaaday in markasta oo qofku filimadaa xun uu daawado ay maskaxdiisa ku reebayso dhibka ay muqaadaraadka maskaxda ku reebaan mid la mid ah. Fiirsashada muuqaaladaas waa wada ugu dhow ee shalayto ku dhaxalsiin kara adduun iyo aakhiro. Ilaahey Galmada sharci darada ah waxaa uu ku tilmaamay wadada ugu xun. Marka maxaad u malaynaysaa Daawashada filimaantaas xun oo ay ka dhalan karaan natiijooyin xun xun. waxaa la gaaray waqtigii ay maskaxdu shaqayn lahayd.

4. Hurdada

Hurdada marka la leeyahay waxaa loola jeedaa inaad waqti dheer hurudo iyo in aadan seexan. Sanadadaan dambe dhallinyaradu waxay kusoo jeedaan waxyaalaha maskaxda daaliya sida Mobilada iyo kambuutarada. Soo jeedka badan jirka ayuu daciifiyaa waxaana yaraanaya wax iska caabinta jirka. Waxaana qofka soo wajahaya cuduro badan iyo caafimaad la,aan.

ka fogow hurdada badan oo ka faaiideyso inta aad yartahay. Marxaladda dhalinyaro nimada waa matxadda beeri taanka wixii aad maanta beerato ayaadna barri guranaysaa.

Haddii aad hurdo iyo ciyaar beerato barrina miraha saboolnimada ayaad guran doontaa.

Almaz Books

Waxyaabaha u wanaagsan nafteenna intooda badan waa bilaash oo lacag maaha, laakiin taa macneheedu maaha inaaney barasho inooga baahneyn, waa arrimaha aan maanta ka hadleyno.

Waxaan ka hadleynaa xirfado ay adag tahay inaan baranno, laakiin nolosheenna si weyn wax uga bedelaysa oo aadan ka qoomameyn doonin:

9- QODOB OO MUHIIM U AH QOFKASTA

1 .Hurdadaada xakamee

Waxaa jira waxyaabo badan oo hurdadaada inaad xakameyso kuu diiday sida inaad jeceshahay dhafarka amaba aadan jeclayn inaad wakhti hore soo kacdo, laakiin marka aad huradada u sameyso wakhti, waxaad arki doontaa inaad dadka kale ka caafimaad badato kana hurdo macaanaato.

2 .Dadka kale la dhaqan

Waad noqon kartaa qofka ugu taajirsan, kan ugu guulaha badan dhanka nolosha, laakiin haddii aadan noqon qof dadka kale la caadifooda oo la murugooda marka ay murugeysan yihiin ama la farxa marka ay faraxsan yihiin, waxaad ogaataa inaad tahay qof bulsho ahaan u fashilmay. Inaad dadka kale dareenkooda la wadaagto oo aad awood u yeelato dareenka xaaladda ay ku sugan yihiin, waxay kaa dhigtaa qof guuleystay, waana

Almaz Books

astaan aaney ka maarmin dadka wax iibiya iyo kuwa ka sheeqaya adeegyada bulshada.

3 .Wakhtigaaga xakamee

Xakameynta wakhtiga waa xirfad aanuu ka maarmin qof kasta oo doonaya inuu nolosha ku guuleysto, ma jirta waddo qura oo cid kasta ku habboon dhanka xakameynta wakhtiga, qofka kaliya ee arrintaa karaa oo wakhtigiisa xakameeyo waa idaga.

4 .Garab weydiiso

Waxaa dhici karta inaad aamisan tahay isku filnaanshiyihu inuu kaa dhigayo shaqaale wanaagsan oo aadan dadka kale u baahneyn. Inaad garab weydiisato shaqaalaha kale ee kaa khibradda badan waa laga maarmaan, ha u ekaan qof uu kibir ku jiro oo aan dadka kale u baahneyn, hadaba inaad barato habka garabka garabka loo weydiisto dadka kale, waa xirfad dad badan ku adag.

5 .Joogteyn

Marka aad ka shaqeynayso marshuur muhiim ah ama aad baraneyso luqad kugu cusub joogteynta ayaa ah tan kaliya ee kuu damaanad qaadeysa inaad guushaada sii wadaneyso, dadka intooda badan marka ay heersare gaaraan ayay shaqadii adkeyd iyo dadaalkii joojiyaan, inaad heerka sare kusii sugnaato waxa kuu damaanad qaadi karaa waa joogteyn oo qura.

6 .Naftaada Wanaagga ugu sheekeey

Almaz Books

Dadka kale waxay ku fakarayaan ee dhanka naftaada muhiim maaha, laakiin waxaa muhiim kuu ah daryeelka naftaada iyo inaad mar kasta wanaag ugu sheekayso, qofku inuu kalsooni heersare ah dhiso isla markaana waxtarkiisa uu ogaado waxbadan ayay u tahay, markaa inaad naftaada wanaagga ugu sheekayso waxay u horseedda tallaabadada kalsooni heersare ah.

7 .Baro xilliyada qaar inaad aamusto

Marka aad xanaaqsan tahay amaba aadan si fiican dareemayn, wax kasta oo afkaaga soo qabta ha dhihin, haddii aad sidaa sameyso gadaal ayaad ka qoomameyn doontaa, inaad afkaaga xirto wakhtiga ku habboon waa xirfadaha ugu muhiimsan ee ay waajibka tahay inaad barato.

8 .Dhageyso

Inta badan marka aad shaqada joogto mashquulka ayaa iska badan, inuu qofku saaxiib ama cid kale uu dhageysto fursad farabadan uma hayo, gaar ahaan marka ay talo doonayaan ama ay mushkiladi haysato, sidaa darteed ogow waxaa muhiim ah inaan dadka kale dhageysato oo waliba aad noqoto dhageyste wanaagsan, qofka aad dhageysanayo waxyaabihii uu kuu sheegay qeyb ka mid ah ugu soo celi.

9 .Isku dirka ka fogow

Waxa kuugu muhiimsan waa xiriirka aad dadka kale la leedahay, hadaba si aad u ilaashato waxaa waajib ah inaad run sheegnimo ku tilmaanaato si aad kalsoonida dadka kale u hanato, waxyaabaha ugu badan ee ay

Almaz Books

dadku kaaga kalsoonida baxaan waa dirdiraalenimada. Inaad isku dirka ka fogaato waxaa dhici karta iney xoogaa macluumaad aad heli jirtay ay kaa qarsoomaan ama saaxiibbo aad ku waydo. Qof hadal kuu wada inaad tiraahdo arrimahaa inaan ogaado ma doonayo,

marka ay cid kale khuseyso ama aad tiraahdo qof kale xantiisa inaga daa, waa arin adag, laakiin ogow kalsoonida ay dadka kale kugu qabaan ayaa sare u qaadeysaa.

AKHRISKA IYO GUUSHA

Diinteenna Islaamka Akhriska way boorisay.

Qur'aanku waxa uu inoogu bishaaraynayaa in uu wadada dhabta ah guusha Isla Qur'aankaa bishaaraadaa wada ayuu Alle u doortay in uu ku bilaabo

erayga "Akhri –

Waxa isku xiran, si ama si kale, guusha uu Qur'aanku wado ee bishaarada ah, iyo akhrinta Qur'aanku wado ee amarka ah.

Guulaystayaasha iyo Akhristayaasha maxaa ka dhexeeya?

Guulaysta yaashu waxay ku guulaysteen waddo saxan oo ay heleen kuwaas oo aanay dadka kale nasiib u yeelan helitaankeeda.

Akhriste yaashuna waxay si fudud u helaan wadooyin badan oo qaarkood ay xaqiiq tahay inay guushu ku jirto.

Almaz Books

Qofka marka uu naftiisa kaliya ka fakaryo waxaa u muuqanayo dhibka haysta iyo caqabadaha uu kala kulmo nolosha, maxaa yeelay, waa waxa kaliya ee uu ka fakarayo.

Ha caroon:

Haddii aad u oggolaato dadka qaar in ay kaa careesiiyaan waxaad oggolaatay in ay kaa guulaystaan. Ma ogtahay in carada ama xanaaqa qaabka ay wax u daaweeyaan uu yahay mar walba qaab aan wanaagsanayn. Rasuulkeena Csw run buu ku sheegay marka uu yiri: "ha caroon, ha caroon, ha caroon".

Ha qasbin:

Saddex haddii ay jabaan ha isku qasbin. Qalbi kaa jabay ha isku qasbin. Qof qatar ku galshay ha qasbin. Kalsooni luntayna ha qasbin soo celinteeda. Xalka kaliya ee saddexdaan aad uga guul gaari karto waa adiga oo abuura kuwa cusub, micnaha dib u soo billow wax walba.

Waa ii dhammaatay!

Iyada oo muddo ilma raadis ahayd ayaa lagu beeray ilmo, qarash badan ayaana ku baxay beeriddaas, in sidaa la sameeyana ammin ayey ku qaadatay in ay u calool galaan. Kadib markii ay ku guulaysatay in ay hesho wixii ay doonaysay oo ay wallacday ayey u dirsatay ninkeeda oo shaqa kasoo rawaxaya jallaato in uu u keeno. Nasiib darro guriga ayuu yimid isaga oo soo hilmaamay jallaatadii, markii uu dhunka is yiri islaantiisa ayey waydiisay jallaatadii, in uu soo hilmaamay ayuu u sheegay, kadib waxay ku qasabtay in uu laabto oo jallaatada keeno kor iyo hoosba. Nin samir badan ayuu ahaa, isla markiiba wuu laabtay

Almaz Books

XASIL OO ILA GARO: XIKMADO KOOBAN

Jacylkaagu ha bato:

Cafiskaaga iyo jacaylkaaguba ha bataan, aaminaaddaadu ha yaraato, sidoo kalena qaladka aad dadka ka galayso iska ilaali.

Aqris iyo aamus:

Aqriska iyo dhagaysigaada oo ad badisaa waxay kuu siyaadiyaan cilmi iyo aqoon nafsi ah. Hadalkaaga oo yaraadaana wuxuu asturaa ceebtaada wax badan oo lagaa ogaan lahaana lagaama ogaado, wuxuuna kordhiyaa ammaantaada. Raadso: Ha raadsan qof aad rajaynayso in uu kaa dhigayo addoon, raadso qof aad agtiisa ka noqon karto boqor. Yey macna ugu fadhisaa? Inta badan oo ay ku xantaan xummaan ha u arkin waa inta badan oo ay maanka kugu hayaan kaana fakarayaan. Qof lagu mashquulo in aad tahay waxay caddayn u tahay jiritaankaaga iyo saamaynta aad leedahay, balse dabeecadda Aadanaha ayaa iska ah in haddii la xamanayo wanaaggiisa la sheego oo xummaantiisa aan la taaban, balse,, taas yey macna ugu fadhisaa marba haddaadan joogin meesha lagugu qalanayo?

Iska hilmaan:

Wax kasta oo ku dhaafay waa sida ay kuu dhaafeen gadaal ha u eegin. Ka taxaddar sida waxa wanaagsan ee kuu soo muuqda aysan kuu dhaafi lahayn ugana faa`iidaysan lahayd.

Dhibkiisa ayuu ku fakaraa:

AlmaZ Books
Telegram
Almaz Books

gaarigiisa ayuu furaha ku rogtay jaallaatadiina waa soo qaaday, isaga oo waddada kula soo jiro ayuu gaarigii shil la galay halkaas ayeyna ku qurbaxeen isaga iyo jallatadii uu siday. Iyada oo si fiican u fadhiisatay calooshana salaaxayso ayuu teleefonkeedu soo dhacay waa isbitaalka ninkaaga ayaa shil galay fadlan kaalay ayaa lagu yiri. Isla markiiba iyada oo nafta ka socoto ayey sii gaartay, nasiib darro markii ay hubsatay in uu ka hadaafay dunida ayey naxdin darteed iyadana soo xoortay ilmihii qarashka badan uga baxay, sidaasna ku waysay ilmihii lagu beeray iyo ninkeedaba. Sariirta isbitaalka markii ay kasoo kacdayna hadalkeeda wuxuu ahaa waa ii dhamaatay 43 sano ayaan jiraa ninna ma haayo ilmana ma haayo, nolol kalinnimo ayaa i sugaysa!.

Noqo sida aad tahay:

In aad tartan gasho ama qof sida uu yahay noqoto dunida sababta laguu keenay maba ahayn. Xusuusnow in kaligaa lagu abuuray, qofna aan laguu ekaysiin, laguna dhihin qof ku dayo, waxaa lagu yiri: noloshaada adiga ayaa iska leh, laba wadda oo midna xuntahay midna wanaagsantahayna waa laguu sheegay, midda aad rabto qaado. Adiga qof kula mid ah lama abuurin, waxaa tahay qof loo abuuray si ka duwan dadka kale, sidaa darteed, qofna ha u ekaan hana isku ekaysiin ee noqo sida aad tahay.

Ku kalsoonow sida aad tahay qofkale kaama badali karee.

Almaz Books

Aragti Cajiib ah.

Bal ila eega aragtidan iso jiidatay :

Hadaba waa maxay waxa qofka ka dhiga 100% inuu guulaysto ?

Haddii ay xuruufta Englishku sidaan yihiin:

A B C D E F G H I J K L M N O P Q R S T U V W X Y Z

Tira ahaan ay sidan noqonayso :

1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11 12 13 14 15 16 17 18 19 20 21 22 23 24 25 26

Haddii xaraf kasta loo soo qaato numberka ku beegan sida, A=1, B=2 ilaa .... Z=26.

Maxay kula tahay haddii aynu la nimaadno oo inaynu guul ku gaarayno nolosheena,

Bal ila eeg tusalayashan soo socda:-

Dadaal badan

(H+A+R+D+W+O+R+K) =

8+1+18+4+23+15+18+11 = 98%

Aqoon

(K+N+O+W+L+E+D+G+E) =

11+14+15+23+12+5+4+7+5 = 96%

Almaz Books

Jacayl

(L+O+V+E) =

12+15+22+5 = 54%

Nasiib

(L+U+C+K) =

12+21+3+11 = 47%

Halkaa waxaynu ka aragnaa inaan midna ina siin darajada aan doonaynay ee ahayd 100%

Tolow ,,,,, ma lacagtaa ?

(M+O+N+E+Y) =

13+15+14+5+25 = 72%

Maya! iyama maaha ....

- Laga yaabaa inaan hogaanka tahay?

(L+E+A+D+E+R+S+H+I+P) =

12+5+1+4+5+18+19+8+9+16 = 97%

Iyana maaha!!

Mushkilad kastaa xal ayaa leedahay, Laga yaabaa hadii aynu badalno dabeecadeena iyo hab dhaqankeena oo kaliya ....

Dabeecada

Almaz Books

" **ATTITUDE** "

(A+T+T+I+T+U+D+E) =

1+20+20+9+20+21+4+5 = 100%

Oow!! Waa dabeecada,

Hadii aynu dadka kula dhaqano dabeecad wanaagsan, waxay is badal wayn oo la taaban karo ke keenaysaa nolosheena dhabtaa.....

Ilaahay ayaa quraankiisa inoogu sheegay 14 qani ka hor:-

(Ilaahay qoomna isbadal kuma keeno ilaa ay iyagu nafahooda wax ka badalaan)

Qofka 100% Waxa wanaajin kara waa dabeecaddiisa. lacag, nasiib ama wax kale qofka sida ugu badan ma wanaajin karaan.

9 Xeeladood Oo Lagu Xoojiyo Awoodda Maskaxda (kor u qaad miiganaantaada)

Jimicsiga maskaxu waxa uu noqday dhaqan dunida ku soo kordhay oo muddooyinkan dambe aad loo isticmaalo, waxaana jira tababarro kala duwan iyo barnaamijyo arrintaas ku habboon. Maskaxda aadamuhu

Almaz Books

waa sida jidhka kale, waxa ay u baahan tahay jimicsi iyo tababarro ay ku kobocdo, xaaladdeeda shaqana ku fiicnaato si aanay u daciifin awoodda garasho ee qofku.

Sida ay ku warrantay shabakadda Aljazeera, qoraaga Elizabeth Ptapova ayaa maqaal ay dhowaan ku qortay shabakad laga leeyahay dalka Ruushka waxa ay ku soo bandhigtay habab ay sheegtay in ay maskaxda u noqon karaan jimicsi caawiya in ay si habsami ah hawlaheeda u gudato. Kuwaas oo ay ka mid yihiin;

HAL XIRAALEYAASHA MASKAXDA KA SHAQAYSIIYA:

Furfurista iyo xal u raadinta hal xidhaalayaasha ku dhisan xisaabta ama hadallada maskaxda uga baahan shaqadu waxa ay ka mid yihiin jimicsiyada maskaxda bani'aadamka dhisa isla markaana ku tababara dhaqso u fikirka, sidaa awgeed waxaa fiican in qofku uu maalin kasta 15 daqiiqo ka shaqeeyo hal xidhaaleyaasha noocan ah.

U FIIRSIGA

U fiirsiga badani waxa uu maskaxda ku abuuraa firfircooni iyo in ay u shaqayso si ka duwan sida ay u shaqayso marka aanay shayga fiiro gaar ah u lahayn, sidaa awgeed in aad arrimaha qaar si xeeldheer ugu fiirsato ugana fikirtaa waa jimicsi u fiican maskaxda.

Almaz Books

CUNTADA

Cuntooyinka aynu cunnaa raadad kala duwan ayaa ay ku yeeshaan maskaxda, sidaa awgeed waxaa waajib ah in aad ka dheeraato cuntooyinka caqabadda ku noqon kara wareegga dhiigga ama looga cabsado in ay xidhaan xididdada dhiigga. Waxaa ka mid ah cuntooyinka ay ku badan yihiin milixda iyo sonkortu. Waxaa kale oo ka mid ah dhammaan cuntooyinka ay kaarboohaydaraytka badan iyo dufanku ku jiraan.

Waxa ay khubaradu ku taliyaan cuntooyinka noocyada kala duwan ka kooban, iyo in kalluunka, beedka, caanaha, badarka, khudradah iyo malabku ay ka mid noqdaan cuntooyinka joogtada loo cuno, maadaama oo la ogaaday in ay faa'iido u leeyihiin maskaxda iyo guud ahaan jidhka.

SHEEKADA

Ka sheekaynta sheekooyinku waa nooc ka mid ah jimicsiyada maskaxdu u baahan tahay. ku dadaal in aad u sheekayso si qurux badan oo dareenka dadka soo jeedinaysa, si dadka ku dhegeysanayaan ay dhugmo ugu yeeshaan hadalkaaga.

Ku dadaal in aad barato xeeladaha kala duwan ee lagu kasban karo dareenka dhegeysi ee qofka. Taas oo macnaheedu yahay in sheekada oo keliyi aanay ku filnayn, balse sida loo werinayo sheekaduna ay muhiim tahay.

Almaz Books

Jooji Talefishanka

Talefishanku siiba marka aad wax xun ka daawato raad taban ayaa uu ku leeyahay habsami u shaqaynta maskaxda, sidaa awgeed waxa ay khubaradu ku talinayaan in la iska joojiyo daawashada badan ee talefishanka.

DHISMAHA JIDHKA

Jimicsiga jidhku waxa uu sida oo kale dhisaa maskaxda aadamaha, gaar ahaan xusuusta iyo awoodda ay u leedahay dhugmada. Waxa uu jimicsigu yareeyaa sakatiga iyo qulubka, waxa aanu wanaajiyaa awoodda dheefsiga.

WAX AKHRISKA

Wax akhrisku waxa uu ka mid yahay jimicsiyada maskaxda aadamaha dhisa, waxa uu maskaxda ku quudiyaa xogo iyo warar aanay hore u aqoonin, waxa aanu ku dhiirrigeliyaa in ay fikirto iyo in ay arrimo kala duwan isu geyso, iskuna daydo is waafajintooda iyo gorfayntooda, arrimahaas oo ah qayb yar oo ka mid ah faa'iidooyinka wax akhrisk ayaa maskaxda ku abuura firfircooni, korna u qaada habsami u shaqaynteeda.

XIRFADO CUSUB

Barashada luuqadaha iyo xirfadaha kala duwani waxa ay maskaxda u yihiin jimicsi xoojiya awooddeeda xusuusta, iyo dhaqso u fikirka, isla markaana kobciya dhugmadeeda iyo fariidnimadeeda.

Almaz Books

CAADO BEDDEL

In la bed-beddelo caadooyinka, tusaale ahaan in aan jid keliya maalin kasta la marin, ee jidad kala duwan shaqada iyo guriga loo maro, in albaabka hadba gacan lagu furo, iyo guud ahaan in la bedbeddlo caadooyinka nololeed ee kala duwani waxa ay maskaxda ku abuuraan baraarugsanaan iyo in ay yeelato fiiro.

AlmaZ Books
Almaz Books

Maxaa kaa cajabiyay buugaan?

Ku qoro halkaan .....

Almaz Books

TIXRAACYO.

buugga "EAT THAT FROG" -LABADA RAH KA WEYN CUN-.

-Brain tracy

- Buugga waad guulaysan kartaa. Dale carnegie

- Buugga waqtigaaga maalgasho.

Sheekh mustafe xaaji Cusmaan haaruun.

Channalka ogaansho. Cumar intishaar

-buugga baadi goobka guusha. Yaasiin yaxye xasan

Maqaal aan kasoo xigtay : Maxamed Muuse Sh. Noor

iyo meelo kale.

MAHAD HAKA GAARTO DHAMAAMTOOD

Almaz Books

Dhammaad

Ma jeclaan lahayd inaad aqrisid buugaagtayda kale ?

1:- Mahiigaanka Maadda

2:- Hanasho jaceyl

3:- Noocyada dhiigga iyo dabeecadaha qofka.

4:- Qisooyinka Qarniga.

5:- Xulka xikmadaha

6:- Ogaansho

7:-Qisooyinka jaceylka

8:- Kun habeen iyo habeen

9:- 999-Xikmadood

Buugtaan waxaad ka helaysaa am aka tilmaan qaadanaysaa meesha aad buuggaan kasoo heshay

Buugaan Lagama gancsan Karo Waana ka mamnuuc siyaabo khaldan in loo isticmaalo @Almazbooks